Heerarka Tayo ee Xuddunta ah

Adeegga Dacwad-ku qaadidda Maxkamaddeed
Maarso 2010

Core Quality Standards
Somali edition, March 2010

Heerarka Tayo ee Xuddunta ah

Adeegga Dacwad-ku qaadidda Maxkamaddeed
Maarso 2010

Arar/Gogoldhig

Adeegga Dacwad-qaadidda Maxkamaddeed (Crown Prosecution Service, CPS) waa adeega guud ee dacwad-qaadidda dadweynaha ee Ingiriika iyo Weelishka. Bishii Jannaayo 2010, waxay isku biireen Xafiiska Dacwooyinka ee Cashuuraha iyo Kastamyada (Revenue and Customs Prosecutions Office, RCPO). Adeegga waxaa madax u ah Agaasimaha Dacwad-qaadidda Dadweynaha (Director of Public Prosecution, DPP) kaas oo sidoo kale ah Agaasime Xafiiska Dacwooyinka ee Cashuuraha iyo Kastamyada. DPP wuxuu hawlgalladiisa u sameeyaa si madaxbanaan, oo u hogaansan kor-kala socodka Qareenka guud, kaas oo ay hawlaha adeegga dacwad-qaadidda kala xisaabtamaan Baarlamaanku.

Heerarkaas gudahooda, erayga *dacwad-qaadayaal* (*prosecutor*s) waxaa loo isticmaalayaa inuu tilmaamo xubnaha adeegga dacwad-qaadidda ee loo qoondeeyey Dacwad-qaadayaasha Maxkamaddeed; dacwad-qaadayaasha xubin ka ah RCPO; Dacwad-qaadayaasha Urureed, kuwaas oo loo qoondeeyey si waafaqsan qaybta 7A ee Sharciga Dacwad-qaadidda Falalka dembiyeed ee soo baxay 1985, ee awooddooda u adeegsada si waafaqsan qaab-tilmaameedka ay samaysay DPP; iyo xubnaha kale ee RCPO kuwaas oo ay qoondaysay DPP kartidiisa Agaasimaha Dacwooyinka ee Cashuuraha iyo Kastamyada ee 2005. Waxaanu erayga *u-doode* u isticmaalaa in aanu tilmaano dacwad-qaadayaal iyo maxkamad-ka doodayaal ama qareeno hawlgal khaas ah, kuwaas oo kiisaska maxkamadda gudaheeda uga hawlgala iyagoo anaga na metelaya.

Dacwad-qaadayaasha waxaa taageera shaqaale sharciyeed oo qabta inta badan shaqooyinka loogu baahan yahay in la dhaqangeliyo go'aanadooda, iyo shaqaale isku–duwayaal oo u hawlgala shaqooyinka sida la socodka wixii kiisaska ka soo kordha, wadashaqayn la sameeya ururada kale, isku hagaajiya waxyaalaha soo xeroonaya iyo faylalka kiiska iyo sawiridda iyo diridda dukumeentiyada.

Heerarkan gudahooda odhaahda *booliiska ama dembi-baadhayaasha kale* (*police or other investigators)* waxaa loo isticmaalayaa in la tilmaamo xubnaha dhammaan ururada dembi-baadhista, oo ay ka mid yihiin Ururka Dembiyada Waaweyn ee Qorshaysan (Serious Organised Crime Agency) iyo Ururka Xuduudaha UK, kaas oo kiisas u diyaariya una soo bandhiga adeegga dacwad-qaadidda.

Booliiska iyo dembi-baadhayaasha kale waxay mas'uul ka yihiin inay su'aalo weydiin ku sameeyaan eedayn ah in laga yaabo in lagu kacay fal-dembi. Kiisaska waaweyn ama dhinacyada badan leh, dacwad-qaadayaasha ayaa go'aan ka gaadha in qof lagu xukumo fal dembi iyo in kale, iyo haddii ay sidaa tahay, waxa uu falka dembi noqon doono. Kiisaska kale, waxaa laga yaabaa in booliiku uu eedaysane amar ku fuliyo, laakiin dacwad-qaadayaasha ayaa mas'uul ka ah go'aaminta in kiis sii socdo iyo in kale. In kasta oo adeegga dacwad-qaadiddu si buuxda ula shaqeeyo booliiska iyo dembi-baadhayaasha kale, haddana way ka madaxbannaan yihiin. Madaxbanaanida dacwad-qaadayaashu waa muhiimad dastuur oo aasaasi ah.

Xubnaha adeegga dacwad-qaadistu waa inay noqdaan kuwo dhexdhaad, cadaali ah oo madaxbaan ahaadaan, kuna salaysan xaqiiqada kiiska. Waa in aanay ogolaan in wax ra'yi shakhsiyeed ah oo la xidhiidha asliyadda ama meesha uu qof ka soo jeedo, jinsiga, kala dhantaalnaan, cimriga diinta ama caqiidada, ra'yiga siyaasaddeed, dookha galmo, ama aqoonsiga jinsiyeed ee eedaysanaha, dhibanaha ama wax markhaati ah ay saamayn ku yeelato go'aanadooda ama hawlgaladooda. Waa inay sidoo kale qaderin u hayaan waajibaadka sharciyeed ee ururada dadweynaha si loogu ololeeyo sinaanta asliyadda, kala-dhantaalnaanta iyo jinsiga, marka la samaynayo go'aano dacwad-ku qaadid.

Heerarkan gudahooda, erayga eedaysane (suspect) waxaa loo isticmaalayaa inuu tilmaamo qof aan weli ahayn mid lagu qaaday hanaan-hawleed dembi oo rasmi ah; erayga dacwad-iska difaacayaasha (defendant) waxaa loo isticmaalayaa qof la xukumay ama sharciga la hor keenay; erayga dembiile (offender) waxaa loo isticmaalayaa inuu tilmaamo qof qirtay dembi uu galay oo u sheegay sarkaal booliis ama dembi-baadhe kale ama dacwad-qaade, ama ay maxkamadda sharciga ah ku heshay dembi.

Buug-yaraha Heerarka Tayo ee Xuddunta ah (Core Quality Standards booklet) waa mid ka mid ah labo dukumeenti oo la soo bandhigay oo ay dadweynuhu heli karaan, oo sharax ka bixinaya ujeeddada iyo shaqada adeegga dacwad-qaadidda. Kan labaadna waa Hannaan Dacwad-qaadayaasha Maxkamadeed (Code for Crown Prosecutors). Hannaanka oo keliya ayaa sharcigu soo saaray. Labadaasi marka laysku daro, waxay dadweynaha ogaysiinayaan waxa ay dacwad-qaadayaashu sameeyaan; sida ay u gaadhaan go'aannadooda; iyo heerka adeeg ee adeegga dacwad-qaadidda u heelan yahay inuu siiyo mid kasa oo ka mid ah dhinacyada muhiimka ah ee shaqadiisa.

Buug-yaraha Heerarka Tayo ee Xuddunta ah iyo Hannaanka waxaa laga heli karaa rugaha wada xidhiidh ee lagu taxay jeldiga dambe ee buug-yarahan.

Hordhac

Doorka iyo ujeedada asalka ah ee CPS iyo RCPO waa in la ilaaliyo badbaadada dadweynaha, gargaar la siiyo dhibanayaasha iyo markhaatiyada iyo in cadaalad la soo bandhigo.

Ilaalinta badbaadada dadweynaha: dacwad-qaadayaal ahaan, waxaanu leenahay door muhiim ah oo aanu ka ciyaarno hoos u dhigidda dembiyada iyo ilaalinta badbaadada dadweynaha. Waxaanu ahaan doonaa kuwo muuqda oo mas'uuliyaddi saran tahay; wakiilo ah oo ka kooban asliyaddo badan oo kala duwan. Waxaanu bulshada aanu u adeegno ugu hawlgeli doonaa si furan oo daacad ah. Go'aanadayada waxaa warbixin ku yeelan doona welwelada dadweynaha.

Gargaar la siiyo dhibanayaasha iyo markhaatiyada: waxaanu awood siinaynaa, dhiirigelinaynaa oo gargaar u fidinaynaa ka qaybqaadashada waxtarka leh ee dhibanayaasha iyo markhaatiyadu ay ka qaybqaadanayaan dhamaan marxaladaha hanaanka cadaaladda dembiyada.

Cadaalad la soo bandhigo: waxaanu hubin doonaa in dadka saxda ahi ay wakhti sax ah gaadhaan go'aanada saxda ah ee ku saabsandacwad-ku qaadidda. Waxaanu si cadaalad ah, munaasib ah oo adag wax uga qabanaynaa hab-dhaqanada falalka dembi iyadoo la isticmaalayo dariiqa ugu waxtarka badan uguna wax-ku-oolsan, oo ah dariiq aan qarsoodi ahayn, si dadweynahu u fahmaan sababaha go'aanada loo gaadhey. Waxaanu caawimo ka geysan doonaa in hanaanka maxkamaddeed laga dhigo mid ah heerka ugu sareeya ee waxtar iyo wax-ku-oolnimo ee suurtogalka ah. Waxaanu ixtiraami doonaa oo ilaalin doonaa xuquuqda bini-aadamka ee dhamaan dadka ay go'aanadayadu saamayn ku yeeshaan, oo ay ka mid yihiin dhibanayaasha, markhaatiyada, eedaysanayaasha iyo dacwad-iska difaacayaasha.

Heerarka Tayo ee Xuddunta ah

Dacwad-qaadayaal ahaan, waxaanu isticmaalaa awoodo aanu dadweynaha ku metelayno. Waxaanu u bixinaa adeeg dadweyne, kaas oo aanu u bixino si waafaqsan tiro **Heerarka Tayo ee Xuddunta ah** oo bulshada ku wajahan, oo dhigaya tayada adeegga dadweynahu xaq u leeyahay inay ka fishaan dadka dacwad-qaadidda sameeya iyagoo iyaga metelay. Waxay dalab u sameeyaan dhamaan kuwa bixiya adeegga dacwad-ku qaadidda.

Heerarku waxay muhiim u yihiin dhibanayaasha, markhaatiyada, eedaysanayaasha iyo dacwad-iska difaacayaasha, ku tiirsan in dacwad-qaadayaashu ay waajibaadkooda u sameeyaan heer aad u sareeya. Booliiska, maxkamadda iyo ururada kale ee cadaaladda dembiyadu waxay sidoo kale doonayaan inay fahmaan heerarka, sababta oo ah waxay ku xidhan yihiin in dacwad-qaadhayaashu bixiyaan adeeg wax-ku-ool ah oo waxtar leh. Dadweynaha iyo kuwo la socda, la xisaabtama ama kormeera dacwad-qaadayaasha waxay doonayaan balanqaad muujinaya qaab aad loogu doonayo, wax-ku-oolna ah oo lagu bixinayo adeeg dadweyne oo muhiim ah oo lagu doonao in dacwad-qaadayaashu ay ka jawaabaan adeeg-bixintooda.

Heerarku waxay salka ku hayaan qaab-waxqabad wanaagsan, waxayna muujinayaan waajibaadkayaga sharci iyo xirfaddeed. Waxaa loo qaabeeyey in la hubiyo in aanu ku dhaqano Xeerarka Hanaan-hawleedka Dembiyada[1] (Criminal Procedure Rules[1]). Waxaanu la tashanay dacwad-qaadayaasha kale iyo hawl-wadeenada kale ee cadaaladda dembiyada. Waxaanu raadiney fekradaha gudiyadayada ka qaybqaadashada bulshada, waxaanuna heerarka ka dhigaynaa kuwo dadeynuhu heli karaan, si aanu isugu keeni karo khibradaha dadka noo yimaada iyo guud ahaan dadweynaha u baahan inay kalsooni ku qabaan waxqabadka dacwad-qaadayaashooda.

Heerarku waxay daboolayaan arimaha muhiimka ah ee shaqadayada ee saamaynta ugu weyn ku leh dadweynaha. Looguma talogelin inuu noqdo liis intaa ku kooban oo ah dhamaan wax kasta oo aanu kiis-hawleedkayaga ku samayno. Waxay qorayaan shaqooyinka ay dacwad-qaadayaashu sameeyaan iyo tiro gaar ah oo qoraalo adeeg tayo leh ah. Waxay metelaan xuddunta guud ee tayo ee ay tahay inay isku xidho wax kasta oo adeegga dacwad-ku qaadiddu sameeyo. Anagoo kuwaa ku dhaqmayna, waa in aanu had iyo goor si xushmad iyo qaderin leh oo xirfadi ku dheehan tahay wadaxaajood ula yeelanaa ururada aanu isku lamaanahay iyo dadweyanaha. Waxaanu dadweynaha ka filaynaa, gaar ahaan kuwa xidhiidhka la leh adeegga dacwad-ku qaadidda, inay isticmaalaan heerarkaas, iyagoo si

[1] Kuwaasi waa xeerar uu ansixiyey Hogaanka Madaxa Cadaaladda (Lord Chief Justice) oo la xidhiidha dariiqa ay tahay inay dacwad-qaadayaasha iyo kooxda dacwad-iska difaacu kiisaska u diyaariyaan iyo sida ay tahay in maxkamaddu kiisadka u maamusho. Waxaa laga heli karaa bogga internet-ka ee Wasaaradda Cadaaladda (Ministry of Justice) (www.justice.gov.uk) ama TSO Orders/Post Cash Department, The Stationery Office, PO Box 29, Norwich NR31GN.

wadajir ah ula isticmaalaya warbixinahayaga waxqabad ee daabacan, si ay u qiimeeyaan sida uu yahay waxqabadkayagu.

Heerarku waxaa taageera dukumeentiyo ka faahfaahsan, oo ka hadlaya dhamaan dhinacyada kale duwan ee shaqadayada, oo ay ka mid yihiin ku hagidda sida wax looga qabto noocyo falal dembi oo gaar ah. Inta badan dukumeentiyadaas waxaa laga heli karaa boggayaga internet-ka www.cps.gov.uk ama in la dalbado (faahfaahin ka eeg jeldiga xagga dambe).

Waa muhiim in la ogaado in adeegga dacwad-ku qaadiddu uu leeyahay waajibaad qarsoodinimo oo la xidhiidha dukumeentiyada qaarkood oo laga tixraaco heerarka gudahooda; tusaale ahaan, qoraalada xafidan ee go'aanada xukun ku qaadid ee lagu sheegay heerka 2 gudahiisa.

Heerarku waxaa sidoo kale taageera tiro qaabab daabacan oo adeeg-bixin ah, oo qoondayn doona waxqabadka la filayo ee la xidhiidha heer walba. Qaababkaasi waxay isticmaalaan xog waxqabad oo ay si joogto ah u ururiyaan adeegga dacwad-qaadiddu. Wixii qaabab cusub oo waxqabad ah waxaa loo qiimayn doonaa si taxader leh, si loo hubiyo inay bixiyaan dariiq saxan oo kharash yar oo loo qiimeeyo waxqabadka. Waxaanu si joogto ah dadweynaha ugu soo gudbin doonaa waxqabadkayaga la xihdiidha qaababkaas.

Heerarku waxay muhiimada lama huraan ah u leeyihiin adeegga dacwad-ku qaadidda. Waxay nagu hagaan isku dubaridida hawlgaladayada iyo qorshaynta hanaanka iyo qaab-hawleedka taageera shaqadayada. Waxaanu filaynaa in shacabku nagala xisaabtamaan haddii aanu ku guuldaraysano bixinta adeegga loo tilmaamay, waxaanuna guulahayaga dacwad-qaadayaal ahaan si joogto ah ugu cabiraynaa awoodayada bixinta heerarkaa tayada leh.

Mid kasta oo ka mid ah 12 heerar ee dukumeentigaan wuxuu daboolayaa qayb gaar ah oo shaqadayada ka mid ah. Liis ah heerarka ayaa ku qoran boggaga 6 iyo 7. Waxa ay xambaarsan yihiin waxaa lagu qoray bogaga soo socda.

Waxaanu si joogto ah dib-uga fiirsi ugu samayn doonaa heerarka, si aanu u hubino inay sii wadaan inay tilmaan ka bixiyaan adeeg xuduneed oo tayo leh. Waxaanu sidoo kale ku kordhinaa markii aanu aqoonsano qaybo kale oo heerarka muhiim ka dhigi doona.

Heerarka Tayo ee Xuddunta ah

Heerka 1: Waxaanu booliiska iyo dembi-baadhayaasha kale siin doonaa talobixin ka caawisa in dembiada dabagal loogu sameeyo si waxtar leh iyo in dembiilayaasha la hor keeno cadaaladda.

Heerka 2: Waxaanu samayn doonaa go'aano dacwad-ku qaadid oo waxtar leh, cadaalad ah, lana samaynayo wakhtiga munaasibka ah iyadoo la waafajinayo Hannaan Dacwad-qaadayaasha Maxkamadeed.

Heerka 3: Waxaanu isticmaali doonaa xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan, taas oo ah dacwad-qaadidda laga maarmo, marka ku haboon, in dhibanaha loo helo maqdhaw degdeg ah, dembiilahana akhlaaq wanaagsan lagu soo celiyo ama la ciqaabo.

Heerka 4: Waxaanu dacwad-iska difaacayaasha u diidi doonaa damiin markii ay taasi munaasib tahay, anagoo si gaar ah xisaabta ugu darayna khatarta ku imaan karta dhibanayaasha iyo dadweynaha.

Heerka 5: Waxaanu kiisaskayaga u diyaarin doonaa si dhakhso ah oo waafaqsan Xeerarka Qaab-hawleedka Dembiyada, si qirasho dembiilenimo loo samayn karo fursadda ugu horaysa, dacwaddo maxkamadeed oo cadaalad ahina ay u dhici karaan taariikhihii loo qoondeeyey.

Heerka 6: Waxaanu kiisaskayaga u soo bandhigi doonaa si cadaalad ah oo adag.

Heerka 7: Waxaanu qiimayn doonaa baahiyaha dhibanayaasha iyo markhaatiyada, waxaanuna la socodsiin doonaa wixii ka soo khordha kiiskooda, waxaanuna raadin doonaa gargaarka munaasibka ah ee ka caawinaya inay bixiyaan cadaymahooda ugu wanaagsan.

Heerka 8: Waxaanu go'aanadayada u sharixi doonaa dhibanayaasha marka aanu kiisas joojino ama wax weyn ka bedelo xukunka.

Heerka 9: Waxaanu maxkamadda ka caawin doonaa hanaan-hawleedka xukun-ku qaadidda iyo kala wareegidda hawl-waxqabadyada dembiga.

Heerka 10: Waxaanu ka fekeri doonaa in aanu isticmaalo xuquuqdayada racfaanka, marka aanu aaminsanahay in maxkamaddu samaysay go'aan sharci oo khalad ah.

Heerka 11: Waxaanu si degdeg ah oo furan ugu hawlgeli doonaa cabashooyinka ku saabsan go'aanadayada iyo adeegga aanu bixino.

Heerka 12: Waxaanu la shaqayn doonaa bulshooyinka, si aanu u ogaano welweladooda marka aanu go'aanada gaadhayno.

Heerka 1

Waxaanu booliiska iyo dembi-baadhayaasha kale siin doonaa talobixin ka caawisa in dembi-yada dabagal loogu sameeyo si waxtar leh iyo in dembiilayaasha la hor keeno cadaaladda.

1.1 Waxaanu booliiska iyo dembi-baadhayaasha kale siinaa talobixin marka ay na weydiiyaan, taas oo marmarka qaarkood laga yaabo inay noqoto ka hor inta aanay diyaar u ahayn inay xidhaan eedaysanaha. Tani waxay badanaa dhacdaa:

a) wixii la xidhiidha eedaysanayaal la aaminsan yahay inay khatar gaar ah oo weyn ku hayaan dadweynaha;

b) marka go'aano muhiim ah loo baahan yahay, kuwaas oo laga yaabo inay saamayn ku yeeshaan sida cadaynta loogu isticmaali doono maxkamada;

c) marka bulsho gaar ah ama kooxo dad ah oo gaar ah ay saamaynayso dembi joogto ah oo laga galo ama dhaqamada bulshada dhibka ku ahr; ama

d) marka fal dembi oo aan caadi ahayn ama xasaasi ah ay dembi-baadhisi ku socoto, sida dil qudhgooyo oo iskaashato ama musuqmaasuq doorasho.

1.2 Waxaanu higsanaynaa in aanu bixino talobixin tayadeedu sarayso, oo lagu bixinayo mudo si aad ah u cayiman oo laysku raacay.

1.3 Talobixinta waxaa lagu bixiyaa ama lagu xaqiijiyaa qoraal ahaan, iyadoo leh sababo, iyo markii ay khusayso, liis ah la samaynayo oo qodobaysan.

1.4 Waxaanu ka talobixinaa:

a) dembiyada ay suurtogal tahay in xukun lagu qaado, ama dariiqyada kale ee wax looga qaban karo dembi samaynta, si dembi-baadhista loogu jihayn karo si sax ah oo waxtar leh;

b) khadadka xog-raadin ee ay u badan tahay in lagu helo kiiska ugu xoogan ee suurtogalka ah;

c) sida ay ugu dhowdahay aqbalidda cadaynta;

d) sida ay tahay in cadaynta loo ururiyo, si maxkamadda loogu soo bandhigo sida ugu wanaagsan;

e) dhicitaanka ay dhici karto in loo baahdo cadayn khibrad ku salaysan;

f) sida waxyaalaha aan la isticmaalin ay tahay in loo ururiyo;

g) dhicitaanka ay dhici karto in maxkamadda laga codsado inay samayso amaro kabid ah, sida Amarro Dhaqamada Bulshada Dhibka, iyo ururinta cadaymaha loogu baahan yahay in taageero dalabyada;

h) isticmaalka awoodo gaar ah oo u baahan ogolaanshaha dacwad-qaadaha, si loo sugo amaanka iskaashiga markhaatiyada ama amar maxkamaddeed si loo helo cadayn;

i) masaafurinta eedaysane;

j) xadididda hantida eedaysanaha; iyo

k) sida cadayn looga helo dalka dibadiisa.

Heerka 2

Waxaanu samayn doonaa go'aano dacwad-ku qaadid oo waxtar leh, cadaalad ah, lana samaynayo wakhtiga munaasibka ah iyadoo la waafajinayo Hannaan Dacwad-qaadayaasha Maxkamadeed[2].

2.1 Waxaanu go'aano ka gaadhnaa in eedaysane skiisas waaweyn ama dhinacyo badan leh xukun loogu qaado iyo in kale. Marka aanu go'aanada gaadhayno, waxaanu isticmaalaa baadhitaano iyo hagge lagu qoray Hanaanka Dacwad-ku qaadayaasha Maxkamaddeed. Hanaan-hawleedyo faahfaahsan oo uu booliiska iyo dacwad-qaadayaashu raacaan waxaa lagu tilmaamaa Hagaha Xukun-ku qaadidda ee Agaasimaha[3] (The Director's Guidance on Charging[3]).

2.2 Waxaanu higsanaa in aanu go'aanadayada gaadhno oo aanu wakhtiyo go'an oo laysla aqbalay gudahood ku ogysiino booliiska ama dembi-baadhayaasha kale.

2.3 Waxaanu qoraal ku xafidnaa sababaha go'aanka xukun-ku qaadid, sida dacwad-ku qaadiddu ay kiiiskooda maxkamadda u hor keeni doonaan iyo sida wixii daldaloolo/diciifnimo ah ama waxyaalaha kiiska layskaga difaaaci karo wax looga qabanayo. Waxaanu sidoo kale qoraal ku samaynaa wixii shaqooyin dheeraad ah ee loo baahan yahay, oo ay ka mid yihiin:

a) wixii cadaymo dheeraad ah oo gaar ah ee ay tahay in la raadiyo, si kiiska loogu xoojiyo, ama loogu taageero dalabyada amarada kabidda, sida Amarro Dhaqamada Bulshada Dhibka ku ama Amaro Xakamayn;

b) in kiisku ku haboon yahay in lala wareego hantida dacwad-iska difaacaha iyo in kale, si uu booliisku xili fiican u bilaabi karo shaqada loo baahan yahay;

c) wixii cadaymo ah ee u-dooduha maxkamadddu ay tahay inuu la aqbalao kooxda dacwad-iska difaacaha si looga fogaado imaatinka markhaatiyo aan loo baahnayn;

d) in la ogaado inay jiraan wax baahiyo gaar ah oo markhaatiyaal ah iyo,
haddii haddaba la og yahay, in la qeexo sida loo dabooli doono baahiyahaas, oo ay ku jiraan wixii talaabooyin gaar ah ee loo baahan yahay in markhaariyada daciifka ah/dagan ama la handadey awood loo siiyo inay si waxtar leh cadayntooda u bixiyaan;

---

[2] Waxaa laga heli karaa boggayaga internet-ka (www.cps.gov.uk) ama in la codsado (faahfaahin ka eeg jeldiga xagga dembe).

[3] Waxaa laga heli karaa boggayaga internet-ka (www.cps.gov.uk) ama in la codsado (faahfaahin ka eeg jeldiga xagga dembe).

e) wixii cadaymo ah oo isticmaalkoodu u baahan doona ogolaanshaha maxkamadda (tusaale ahaan cadaymaha dhaqan xumada iyo cadaymaha ah wax dadku isu sheegsheegeen) haddii uu dacwad-iska difaacuhu maxkamadda ka sheegto inuusan dembiile ahayn; iyo

f) wixii warbixino ah ee hadda la heli karo ee ay tahay in lagu daro liiska waxyaalaha aan la isticmaalin.

2.4 Haddii laga fekero in ay caawimo noqonayso in qiimayn lagu sameeyo ku kalsoonaanshaha markhaati' cadayn ama in si ka fiican loo fahmo cadayn dhinacyo badan leh, waa in uu dacwad-qaadaha si munaasib ah loo tababaray oo la ansixiyey sameeyaa waraysi dacwadda ka hor ah oo uu markhaatiga ula yeesho si waafaqsan Hannaanka hawlgal ee khuseeya.

2.5 Waxaanu sidoo kale:

a) samaynaa in ay tahay in damiin la diido, iyo haddii ay sidaa tahay, sababaha, ama haddii ay munaasib tahay, shuruudaha ay tahay inuu u-dooduhu maxkamadda ka codsado inay ku xidhaan;

b) tilmaanaa in, haddii damiin la bixiyo iyadoo ay dacwad-qaadiddu ka soo horjeedo, inay jiraan xuquud racfaan iyo inay tahay in u-dooduhu isticmaalo iyo in kale;

c) aqoonsanaa in kiisku ku haboon yahay in la codsado in maxkamadda hoose lagu qaado, ama uu yahay mid intaa ka weyn oo uu u-dooduhu ay tahay inuu maxkamadda hoose ka codsado inay u gudbiso Maxkamadda Sare;

d) qeexnaa wixii qirasho dembiyo kale ah oo la aqbali karo, ama waxay qirashadu ku salaysan tahay, anagoo ka taxaderayna in aanu hubino in maxkamaddu qaadi karto xukun u dhigma int aay leeg tahay weynaanta falka dembi, gaar haan marka ay jiraan waxyaalo arinta sii adkaynaya; iyo

e) aqoonsanaa wixii amarro ah ee ay tahay in u-dooduhu uu maxkamadda weydiisto, si uu ugu kordhiyo xukun-ku qaadidda dacwad-iska difaacaha.

2.6 Haddii uu gao'aanku noqdo inaan dacwad la qaadin, dacwad-qaaduhu wuxuu sheegayaa dhinacyada dembiga ee aan la cadayn karin, sababaha aan loo cadayn karin, ama , markii ay munaasib tahay, sababta aan dacwad-ku qaaidid loogu baahnayan danaha dadweynaha.

Heerka 3

Waxaanu isticmaali doonaa xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan, taas oo ah dacwad-qaadidda laga maarmo, marka ku haboon, in dhibanaha loo helo maqdhaw degdeg ah, dembiilahana akhlaaq wanaagsan lagu soo celiyo ama la ciqaabo.

3.1 Marka la gaadho go'aan ah inay jirto cadaymo ku filan in dacwad-ku qaadid la aqbalo, waxaanu ka fekeri doonaa inay jirto xal-daadhid maxkamadda ka baxsan oo munaasib ah oo lagaga maarmi karo dacwad-qaadidda, oo ku haboon inta ay leegtahay weynaanta iyo cawaaqibka ka dhashay falka dembi, daboolaysana ujeedooyinka akhlaaq wanaagsan ku soo celinta, magdhawga iyo ciqaabidda.

3.2 Inta uu booliiska iyo dembi-baadhayaasha kale ay iyagu ku hawlan yihiin xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan oo gaar ah, waxay u baahan yihiin ansixin ay ka helaan dacwad-qaade ka hor inta aanay dembiile siin digniin sahlan[4], oo ay ka siiyaan dembi khatar ah, oo haddii xukun lagu qaadi lahaa ay u hawlgeli lahayd Maxkamadda Sare oo keliya. Waxaanu dembiyadaas digniino u ansixinaa xaaladdo gaar ah oo keliya. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aanu booliiska ku jihayno inuu kiisas kale siiyo digniin sahlan, haddii uu dembiilahu si toos ah u qirtay dembigiisa ama uu soo jeediyey, tusaale ahaan samaynta Ogaysiis Ganaax qas/Fawdo (Penalty Notice for Disorder). Hase yeeshee, samaynta Ogaysiis Ganaax qas/Fawdo waa go'aan uu booliisku iska leeyahay.

3.3 Booliiska iyo dembi-baadhayaasha kale waxay sidoo kale u baahan yihiin ansixin ay ka helaan dacwad-qaadaha ka hor inta aanay bixin digniin shuruudaysan. Digniinta shuruudaysan waxaanu qornaa shuruudaha ay tahay in dembiiluhu ku dhaqmo.

3.4 Marka la go'aaminayo in la bixiyo digniin sahlan ama digniin shuruudaysan, waxaanu xisaabta ku darnaa arimaha ah danaha dadweynaha ee ku qoran Hanaanka Dacwad-qaadayaasha Maxkamaddeed gudahiisa, gaar ahaan fekradaha dhibanaha, iyo hagaha lagu bixiyey Hagaha Agaasimaha ee Digniin-bixinta Shuruudaysan iyo Wareegtooyinka khuseeya ee Wasaaradda Arimaha Gudaha (Home Office Circulars).

3.5 Marka la go'aaminayo in la bixiyo digniin shuruudaysan, waxaanu sidoo kale xisaabta ku darnaa:

a) in ay jirto fursad uu dembiiluhu ku sixi karo wixii uu sameeyey, intii maxkamad la soo taagi lahaa. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa

[4] Dembiilayaasha da'yarta ah lama siin karo digniin sahlan. Hase yeeshee, waxaa la siin karaa Canaan ama Digniin kama dambays ah. Si munaasib ahaan ah ayaanu kelmadda digniin Heerarkan gudahooda ugu isticmaalaa iyadoo sidoo kale qaybahaas la ticraacayo. Dembiilayaasha da'yarta ah waxaa laga yaabaa in la siiyo digniin shuruudaysan.

inuu bixiyo dayactirkii waxyeelada, ama uu dhibanaha uu dulmiyey u magdhawo;

b) in baahida ah in la yimaado barnaamij lagaga caawinayo inay wajahaan waxyaalaha sababta asalka u ah dembiga uu galay (sida khamriga ama isticmaal daroogo) ay u badan tahay inay ka joojiso inuu falalka dembi sameeyo;

c) in ay tahay danaha eedaysanaha, dhibanaha ama bulshada; iyo

d) in dembiilaha looga baahan yahay inuu bixiyo ganaax hantiyeed ama uu si bilaa lacag ah u shaqeeyo.

3.6 Digniin shuruudaysan lama ansixin karo dembiile dembi rabshad ah galay, ilaa mooyee uu kiisku yahay mid yar, oo ay, haddii la xukumo ay keliya oo u halwgeleyso maxkamadda hoose.

3.7 Haddii uu eedaysanuhu diido inuu aqbalo digniin sahlan ama uu qiran waayo dembiilenimo, marka la siiyo digniin shuruudaysan, oo uu aqbalo shuruudaheeda, waxaa laga yaabaa in lagu qaado dacwad ah dembigii hore/asalka ahaa.

3.8 Haddii uu dembiilahu ku dhaqmi waayo shuruudaha wixii xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan ah,, waxaanu dib uga fiirsan doonaa danaha dadweynaha, waxaanuna go'aansan doonaa in xukun lagu qaado iyo in kale. Badanaa waa in dacwad ku qaadidda lagu sameeyaa dembigii hore/asalka ahaa.

3.9 Waxaanu Maxkamadda ku baraarujin karaa digniin sahlan iyo digniin shuruudaysan haddii dembiilaha mar dambe lagu qaado xukun ah fal dembi oo dambe.

Heerka 4

Waxaanu dacwad-iska difaacayaasha u diidi doonaa damiin markii ay taasi munaasib tahay, anagoo si gaar ah xisaabta ugu darayna khatarta ku imaan karta dhibanayaasha iyo dadweynaha.

4.1 Dhamaan dacwad-iska difaacayaashu waxay xaq u leeyihiin damiin, ilaa mooyee in la helo mid ama wax ka badan oo ah sababo gaar ah oo damiinashada loogu diido[5].

4.2 Kulan dhagaysi maxkamaddeed oo walba, u-dooduhu wuxuu ka fekeraa in ay jiraan sababo damiinashada loo diido, ama inuu maxkamadda ka codsado inay shuruudo ku xidho damiinashada dacwad-iska difaacaha.

4.3 Marka aanu ga'aankan gaadhayno waxaanu xisaabta ku darnaa:

a) in uu falka dembi yahay mid ka mid ah tiro dembiyo ah oo ay tahay inay jirto xaalad khaas ah ka hor inta aan dacwad-iska difaacaha loo ogolaan damiin;

b) nooca iyo quwada ay leedahay cadaynta dacwad-iska difaacaha laga hayaa;

c) inta ay leegtahay weynaanta falka dembi ee lagu soo oogay;

d) falalkii dembi ee uu dacwad-iska difaacuhu haore u galay, oo ay ku jiraan taariikhdiisii hore ee u hogaansamidda damiinta;

e) in uu dacwad-iska difaacuhu wakhtigan hadda ahba ku jiro damiin falal dembi oo kale;

f) wax taariikh hore oo cabashooyin noocan oo kale ah;

g) wax warbixino ah oo muujinaya inay u badan tahay dacwad-iska difaacuhu uu faragelin ku samayn doono markhaatiyada ama cadaymaha; iyo

h) wixii kale ee laga og yahay dacwad-iska difaacaha, sida baadhitaan daroogo oo lagaga qaaday saldhiga booliiska.

4.4 Xiliga Dood-maxkamaddedka, U-dooduhu wuxuu sameeyaa sababo gaar ah oo aanu damiin kaga soo horjeesano ama ku dalabno in shuruudo lagu xidho, wuxuuna sameeyaa warbixinaha la heli karo ee

[5] Waxaa jira sadex sababood oo waaweyn, kuwaas oo lagu soo koobi karo inay jiraan sababo aad ah oo lagu aamino in dacwad-iska difaacahu, haddii damiin lagu sii daayo: uu ku guuldaraysanayo inuu xabsiga isu dhiibo; fal dembi sameeyo inta uu mudada damiinta ku jiro; ama uu faragelin ku sameeyo markhaatiyada ama uu haddii kale cadaaladda is hortaago, ama isaga hala xidhiidho ama qof kale.

taageeraya sabab walba, oo ay ku jiraan wixii welwel ah ee uu dhibanuhu ka qabo in dacwad-iska difaacaha damiin lagu sii daayo.

4.5 Hadii uu dacwad-ku qaadiddu leeyahay xuquuq racfaan oo uu ka qaato bixin damiin (tani waa marka uu falka dembi xambaardan yahay xukun laga yaabo inuu noqdo xabsi), waxaa xiligaa ka hor go'aan ka gaadhnaa in khatarta ku imaan karta dhibanaha ama dadweynaha ay abuurayso in racfaan laga qaato haddii ay maxkamadda hoose bixiso damiin. Haddii ay maxkamadda hoose bixiso damiin kiis aanu go'aaminey inay munaasib tahay in racfaan laga qaato, u-doodaha ayaa isla markiiba ogaysiis maxkamadda siiya, ogaysiiskaas oo ah in aanu doonayno in aanu rafcaan qaadano, si dacwad-iska difaacaha xabsiga loogu sii hayo inta dacwadda racfaanka laga dhegaysanayo.

4.6 Dacwad-iska difaacayaashu waxay xaq u leeyihiin inay xaakim racfaan ula qaataan joojin damiin ama ku shuruudo ku xidhid ay maxkamadda hoose ku soo rogtey. Waxaanu tagnaa kulan-dhegaysi maxkamddeed oo racfaan oo kasta, si aanu u hor istaagno dalabka ama usoo jeedino shuruudaha munaasibka ah, haddii uu xaakimku go'aansado inuu bixiyo damiin ama uu bedelo shuruudaha hore u jirey.

4.7 Marka dacwad-iska difaace maxkamadda loogu soo celiya inuu jebiyey shuruudihii damiinkiis ama ay sarkaal booliis ula muuqatay inay u badan tahay inuu jebinayo shuruudihiisii, u-dooduhu wuxuu xog-u gudbin u sameeyaa maxkamadda hoose, taas oo ku saabsan in damiinka laga joojiyo ama shuruudaha la bedelo.

4.8 U-dooduhu wuxuu qoraalo faahfaahsan ka sameeyaa faylalka kiiska, isagoo samaynaya in aanu damiin ka soo horjeedno iyo in kale, iyo haddii ay sidaa tahay, sababaha aanu soo gudbiney ee aanu damiinka ku diidanahay ama aanu ku raadinayno shuruudo lagu xidho, iyo wixii soo gudbin ah ee ay kooxda dacwad-iska difaacuhu ka sameeyeen. Tani waxay naga caawisaa ina aanu wax ka qabano ferer-soo jeedinaha dambe ee in xaaladda isbedel ku yimaado, isbedeladaas oo laga yaabo inay u gogol-xaadho bixinta damiinka ama fududaynta shuruudaha damiinka, iyo in la aqoonsado wixii difaac ah ee ay u badan tahay in isbedelka/lada laga sameeyo.

Heerka 5

Waxaanu kiisaskayaga u diyaarin doonaa si dhakhso ah oo waafaqsan Xeerarka Qaab-hawleedka Dembiyada[6], si qirasho dembiilenimo loo samayn karo fursadda ugu horaysa, dacwaddo maxkamadeed oo cadaalad ahina ay u dhici karaan taariikhihii loo qoondeeyey.

Kulan-dhegaysiga maxkamaddeed ee ugu horeeya ee maxkamadaha hoose

5.1 Dhamaan dacwad-iska difaacayaashu waxaa marka ugu horaysa la soo taaga maxkamadda hoose.

5.2 U-doodayaasha ayaa kulan-dhegaysiga ugu horeeya diyaariya iyagoo:

a) ka fekeraya go'aanka xukun qaadid iyo tilmaamaha iyo in wax dib-uga fiirsi kale oo kiiska lagu sameeyo ah loo baahan yahay;

b) marka uu kiiska xukunkiisa booliisku sameeyey, iyagoo ku qanacsan in xukunku yahay mid munaasib ah oo la cadayn karo, dacwad-ku qaadiddana loogu baahan yahay danaha dadweynaha;

c) haddii uu booliisku damiin diiday, iyagoo go'aan ka gaadhaya in la raadsado xabsi ku hayn ama shuruud munaasib ah oo lagu xidho damiinta dacwad-iska difaacaha;

d) diyaarinaya wixii loo soo bandhigayo maxkamadda diidan damiinta ama la xidhiidha ku soo rogidda shuruudo damiineed; iyo

e) qaadaya talaabooyin si loo hubinayo in horumar laga samayn karo kiiska iyo in laga fogaado wixii hakaddo aan loo baahnayn ah, sida in la hubiyo in kooxda dacwad-iska difaacaha iyo maxkamaddu heleen faahfaahintii hore ee kiiska dembiga lugu qaadayo.

5.3 Wakhti wanaagsan ka hor inta aan maxkamaddu bilaaban, ayaa u-doodayaashu isu diyaariyaan inay la kulmaan la-taliyayaasha sharci ee maxkamadda, qareenada dacwad-iska difaacuha iyo sarkaalo ka socda Adeegga Damaanadda Shuruudaysan ama Adeegga Dembiilayaasha Da'yarta si loo aqoonsado kiisaska ay u badan tahay inay ka soo baxdo xukun dembiilenimo, si marka ay suurtogal tahay, warbixinno xukunka ka hor ah loo diyaarin karo maalintaas, si maxkamadda awood loogu

[6] Xeerarkaas waxaa ansixiyey Hogaanka Madaxa Cadaaladda (Lord Chief Justice) oo la xidhiidha dariiqa ay tahay inay dacwad-qaadayaasha iyo kooxda dacwad-iska difaacu kiisaska u diyaariyaan iyo sida ay tahay in maxkamaddu kiisadka u maamusho. Waxaa laga heli karaa bogga internet-ka ee Wasaaradda Cadaaladda (Ministry of Justice) (www.justice.gov.uk) ama TSO Orders/Post Cash Department, The Stationery Office, PO Box 29, Norwich NR31GN.

siiyo inay dembiilaha xukunku qaado imaantin dambe oo uu maxkamadda yimaado la'aanteed.

5.4 Marka dacwad-iska difaace qirto dembiilenimo, u-doodayaashu:

a) waxay maxkamadda u qeexaan xaqiiqooyinka kiiska, oo ay ka mid yihiin, markii ay munaasib tahay wax muuqaal ahaan ah oo duuban iyo Qoraalkii Shakhsiyeed ee Dhibanaha, si ay u qaadaan xukun si buuxda u muujinaya khatarnimada falka dembi;

b) waxay dareen iyo fiiro u soo jiidaan wixii xukuno hore ah iyo, markii ay munaasib tahay, digniino sahlan ama digniino shuruudaysan oo qoraal ahaan looga hayo dembiilaha[7];

c) waxay hubiyaan in ay maxkamaddu ka warqabto awoodaheeda xukun ku qaadid, oo ay ku jiraan wixii xukun ama amar ah ee ay u baahan tahay inay sharci ahaan qaado; iyo

d) waxay maxkamadda ka codsadaan inay ka fekerto wixii munaasib ah ee amaro kabid ah sida magdhaw ama Amar Dhaqamada Bulshada Dhibka ku ah ama Amar Xakamayn, oo laga yaabo inuu koobo awooda dembiilaha ee uu kustaqbalka ku samaynayo falka demb. Waxaa laga yaabaa in aanu wax intaa ka badan oo ku saabsan doorka dacwadqaadaha ee qaab-hawleedka xukun ku qaadidda ku qorno heerka 9 gudahiisa.

5.5 Marka maxkamadda hoose dembiile u gudbiso Maxkamadda Sare si xukun loogu qaado (sababta oo ah inay aaminsan yihiin in xukunka ugu sareeya ee ay ku qaadi karaan uu yahay mid aan ku filayn), waxaa Maxkamadda Sare loo diraa nuqulo cadaymaha ah iyo liis ah wixii xukunno ah, digniinno sahlan ama diniinno shuruudaysan oo laga qoray dembiilaha, si xaakimku uu u diyaarin karo kulanka maxkamaddeed ee xukun ku qaadidda.

5.6 Haddii uu dacwad-iska difaacuhu muujiyo in uu doonayo inuu aqbalo qirasho dembiilenimo, kiiskuna uu yahay mid loogu hawlgeli karo maxkamadda hoose ama Maxkamadda Sare, u-doodaha ayaa maxkamadda ogaysiiya in dacwad-ku qaadidda lagaga fekerayo in kiisku uu ku haboon yahay inay iyagu u hawlgalaan, ama uu intaa ka weyn yahay oo ay tahay in loo gudbiyo Maxkamadda Sare si halkaa dacwadda loogu qaado.

5.7 Haddii ay noqoto in kiiska lagu qaado Maxkamadda hoose, u-dooduhu:

[7] Xeerarkaas waxaa ansixiyey Hogaanka Madaxa Cadaaladda (Lord Chief Justice) oo la xidhiidha dariiqa ay tahay inay dacwad-qaadayaasha iyo kooxda dacwad-iska difaacu kiisaska u diyaariyaan iyo sida ay tahay in maxkamaddu kiisadka u maamusho. Waxaa laga heli karaa bogga internet-ka ee Wasaaradda Cadaaladda (Ministry of Justice) (www.justice.gov.uk) ama TSO Orders/Post Cash Department, The Stationery Office, PO Box 29, Norwich NR31GN.

a) wuxuu u-doodaha dacwad-iska difaacaha kala xaajoon doonaa wixii cadaymo ah ee lasyku raaci karo iyadoo aan loo baahan in markhaatiga ay khuseeysaa uu maxkamadda yimaado;

b) wuxuu caawimo ka geysanayaa in maxkamaddu aqoonsato arimaha dacwadda laga soo oogey;

c) wuxuu hubinayaa in maxkamaddu ay ka warqabto taariikhaha dooda maxkamadda ee aan munaasibka u ahayn markhaatiyada dacwad-ku qaadidda;

d) wuxuu maxkamadda ka codsanayaa inay bixiso warbixino la xidhiidha jadwalka diyaargarowga ee doodad maxkamadda, oo ay ki jiraan dalabyada qaabab gaar ah oo lagu caawinayo markhaariyadu inay cadaymahooda u bixiyaan si waxtar leh iyo ogaysiis ah in la istimaalo cadaymo hab-dhaqan xun ama cadaymo waxyaalo dadku isu sheegsheegeen ah

e) wuxuu faylasha gudahooda ku qorayaa wixii shaqo dheeraad ah ee ay dacwad-qaadiddu u baahan doonto inay samayso, si ay diyaar ugu noqoto doodd maxkamadda iyo mudadda lagu samaynayo.

5.8 Haddii ay noqoto in kiiska loo gudbiyo Maxkamadda Sare[8], ama ay maxkamadda hoose go'aan ku gaadho inuu kiisku yahay mid aad u weyn oo ay tahay in lagu qaado Maxkamadda Sare, ama dacwad-iska difaacuhu uu doorto in Maxkamadda Sare la soo taago, oo uuna yahay kiis loo ogol yahay inuu sidaa sameeyo, waxaanu maxkamadda hoose ka caawin doonaa samaynta taariikhda kulanka doodda maxkamadda ee ku xiga, anagoo qiyaasayna inta ay anaga iyo booliiska ama dembi-baadhayaasha kale u baahan doonaan inay ku soo gabagabeeyaan shaqada looga baahan yahay kulanka doodda maxkamadda ee ku xiga.

Diyaarinta dood maxkamaddeed ama hanaan-hawleed gudbin oo maxkamadda hoose iyo kulan –dhegaysiga maxkamaddeed ee uugu horeeya ee Maxkamadda Sare

5.9 Sida udu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah ka dib marka uu dacwad-iska difaacuhu maxkamadda hoose ka sheegto dembi la'aan, ama kiiska loo hakiyo hanaan-hawleed gudbin ama loo diro Maxkamadda Sare, waxaanu go'aamin doonaa wixii talaabooyin dheeraad ah ee looga baahan yahay kulan dhegaysiga maxkamaddeed ee ku xiga ee kiiska.

[8] Qaar ka mid ah kiisaska waaweyn waxaa keliya oo lagu qaadi karaa Maxkamadda Sare. Waxaa halkaa si degdeg ah ugu dirta maxkamadda hoose, taas oo hoos timaada hanaan-hawleed gaar ahiyadoo aan loo baahan hanaan-waxqabad u gudbin

5.10 Mudo wakhti oo cayiman gudaheed, waxaanu weydiinaa booliiska ama dembi-baadhayaasha kale:

a) inay noo soo diraan faylal ay ku qoran yihiin cadaymaha iyo waxyuaalaha kale ee la ururiyey xiligii dembi-baadhista iyo inay dhameeyaan wixii hawlo ah ee ka taagan go'aanadii asalka ahaa ee xukun ku qaadidda;

b) inay noo soo diraan wixii cadaymo ama warbixino dheeraad ah ee loogu baahan yahay kulan-dhegaysiga maxkamaddeed ee ku xiga, oo ay ku jiraan qorshayaal ama sawiro si kiiska looga dhigo mid maxkamaddu si ka fudud u fahmi karto

c) inay sameeyaan wixii hawlo kale oo gaar ah ee lagu aqoonsaday kulan-dhegaysigii ka horeeyey; iyo

d) inay noo soo diraan jadwal ama waxaaylo aan la isticmaalin oo la xidhiidha ee la ururiyey xiligii dembi-baadhista, is aanu ugu dhaqmi karo waajibaadkayaga sharci si aanu dacwad-iska difaacaha u siin karo wixii walyaalo ama warbixino ah ee laga yaabo inay carqaladdeeyaan kiiska dacwad-ku qaadidda ama ay taageeraan kiiska dacwad iska difaaca.

5.11 Haddii ay noqoto in kiiska lagu qaado maxkamadda hoose, waxaanu mudo wakhti oo cayiman gudaheed Unugga Daryeel Markhaati[9] ku weydiisanaa inuu u sheego markhaatiga u baahan inuu cadayn maxkamadda ka bixiyo, taariikhda dooda maxkamadda, oo kala hadlo wixii caawimo ah ee ay xiliga maxkamadda u baahan doonaan, ka hor inta aan kulan-dooddeedka maxkamaddu dhicin. Kiisaska ka dhaca Maxkamadda Sare, waxaanu ka codsanaa inay sidan sameeyaan ka dib marka dacwad-iska difaacuhu sheegto inuu dembi la'aan yahay.

5.12 Waxaanu higsanaa in aanu waxyaalaha cusub ee booliiska ama dembi-baadhayaasha kale soo gudbiyaan iyo waxyaalaha ay kooxda dacwad-iska difaaacu noo soo diraan ugu hawlgalo mudo wakhti oo cayiman gudaheed.

5.13 Marka kiis loo diyaarinayo kulan-dood maxkamaddeed, gudbin ama Kulan-dhegaysiga ugu horeeya ee Maxkamadda Sare, waxaanu:

a) qiimayn ku samaynaa in ay weli jirto cadaymo ku filan oo keeni kara saadaal macquul ah oo xukun-ku qaadid iyo in kale iyo in dacwad-qaadid weli loogu baahan yahay danaha dadweynaha iyo in kale, iyadoo la aqoonsanayo wixii isbedelay ilaa intii uuu kiiska markii ugu horaysey dacwad-qaade ka fiirsaday;

[9]Adeegga dacwad-qaadayaasha iyo booliisku waxay sameeyeen Unugyo Daryeel Markhaati oo wadajir ah, si ay u qorsheeyaan in markhaatiyada dacwad-ku qaadiddu maxkamadda yimaadaan, in la qiimeeyo baahiyahooda si ay cadaymahooda ugu bixin karaan si waxtar leh iyo in lagu wargeliyo wixii ka soo kordha kiiskooda iyo natiijadiisa.

b) go'aan ka gaadhi doonaa in cadaymo dheeraad ah la raadiyo si kiiska loo xoojiyo;

c) haddii dembiga la xukumay aanu xiligaa wixii ka dambeeya sii socon karin, waxaanu ka fiirsanaa wixii dembi kale ah ee looga gudbi karo ee la cadayn karo, kaas oo dacwad-ku qaadid loogu baahan yahay danaha dadweynaha;

d) qoraalo u diyaarinaa u-doodaha kiisaska intooda badan, iyadoo lagu muujinayo sida qayb walba oo falka dembi ah loo cadaynayo, oo ay ku jiraan quwadda iyo diciifnimada cadaymaha, sida wax looga qabanayo difaaca ay u badan tahay inuu dacwad-iska difaacuhu adeegsanayo iyo in dacwad ku qaadid weli loogu baahan yahay danaha dadweynaha;

e) qeexaynaa wixii qirashao dembi ee kale ee la aqbali karo, ama waxay qirashadu ku salaysan tahay, iyadoo laga taxadarayo hubinta in maxkamaddu qaado xukun u dhigma inta uu falka dembi weynaan leegyahay;

f) kooxda dacwad-iska difaacaha siinaa nuqulada ah wixii cadaymo dheeraad ah oo aanu doonayno in aanu ku tiirsanaano;

g) haddii aan hore loo samayn, waxaanu diyaarinaa dalabyo qoraal ah ama ogaysiisyo oo ah qaabab gaar ah oo awood lagu siinayo markhaatiyada inay cadaymahooda u bixiyaan si waxtar leh iyo ogolaansho in la isticmaalo wixii cadaymo ah ee u baahan ogolaansho maxkamadda laga helo;

h) waxaanu go'aan ka gaadhnaa in waxyaalaha aan la isticmaalin ay tahay in loo sheego kooxda dacwad-iska difaacaha, sababta oo ah inay laga yaabo inay carqalad ku noqoto kiiska dacwad-qaadidda ama ay taageerto kiiska difaaca;

i) waxaanu go'aan ka gaadhnaa in waxyaalah laga yaabo inay carqalad ku noqoto kiiska dacwad-qaadidda ama ay taageerto kiiska difaaca ay yihiin kuwo xasaasi ah oo ay tahay in maxkamadda laga codsado in la hayn/qarin karo;

j) waxaanu kooxda dacwad-iska difaacaha u dirnaa jadwal ah dhamaan waxyaalaha aan la isticmaalin ee aan xasaasiga ahayn ee aanu ka fiirsanay, oo ay la socdaan nuqulo ah waxyaalaha la sheegay ama tilmaamaha haddii la kormeeri karo. Waxaanu intaa wax ka badan oo arintan ah ku sheegnay tuducda qoraal ee 19 ilaa 25 ee heerkan;

k) waxaanu hubinaa in dhibanaha la siiyey fursad uu ku diyaariyo Qoraal Shakhsi oo Dhibane, oo la isticmaalo xiliga kulan-dhegaysiga maxkamaddeed haddii dacwad-iska difaacaha la xukumo;

l) haddii ay munaasin tahay, waxaanu u qorshaynaa markhaatiga waraysigiisii cajalada muuqaal laga daarayo maxkamadda inuu arko duubitaanka ka hor kulan-dooddeedka maxkamdda, si uu xusuustiisa u cusboonaysiiyo ka hor inta aanu cadaynta bixin; iyo

m) hubinaa in baahiyo kale oo markhaatiyaal wax laga qabanayo iyo in talaabooyinka ku haboo la qaadayo si loo hubiyo in markhaatiyadu maxkamadda yimaadaan.

5.14 Waxaanu booliiska ama dembi-baadhayaasha kale iyo kooxda dacwad-iska difaacaha ka codsanaa inay jawaab uga soo celiyaan wixii arimo taagan ah sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah.

5.15 Haddii sababta ay doontoba ha ahaatee, ay u badan tahay in kiiska aanu dhici doonin taariikhda loo qoondeeyay, waxaanu maxkamadda ka codsanaa inay ka fekerto inay samayso taariikh cusub.

Hawlaha dheeraadka ah ee loo baahan yahay marka kiisas loo diyaarinayo Maxkamadda Sare

5.16 Marka kiisas lagu dhegaysanyo Maxkamadda Sare, waxaanu diyaarinaa qoraalo sheegaya dacwaddaha lagu soo oogayo dacwad-iska difaacaha oo u qoran sida rasmiga ah ee ay Maxkamadda Sare U baahan tahay.

5.17 Waxaanu sidoo kale diyaarinaa tilmaamo qoraal ah oo aanu u diyaarino u-doodaha kiiska Maxkamadda Sare ka soo bandhigi doona. Dhamaan U-doodayaasha loo ansixiyey inay Maxkamadda Sare ka metelaan dacwad-ku qaadidda waxaa la siiyaa tiro tilmaamo heerarka ah oo la yidhaahdo: *Tilmaamaha CPS ee U-doodayaasha Dacwad qaadidda (CPS Instructions for Prosecuting Advocates*[10]*)*. Waxa intaa dheer, in aanu:

a) ku lifaaqno nuqulo ah dhamaan cadaymaha kiiska laga ururiyey, jadwalka waxyaalaha aan xasaasiga ahayn ee aan la isticmaalin, anagoo qorayna go'aanada dacwad-qaadaha ee bixinta waxyaalaha la siinayo kooxda dacwad-iska difaacaha iyo dhamaan wararka la is dhaafsaday maxkamadda, booliiska iyo qareenka dacwad-iska difaacah oo liis loogu qoray shayshay;

b) bixinaa nuqulo ah wixii qoraalo ama ogaysiisyo qoraal ah oo u baahan ogolaansho maxkamaddeed sida qaabab gaar ah oo lagu caawinayo markhaariyadu inay cadaymahooda u bixiyaan si waxtar leh ama

[10]Adeegga dacwad-qaadayaasha iyo booliisku waxay sameeyeen Unugyo Daryeel Markhaati oo wadajir ah, si ay u qorsheeyaan in markhaatiyada dacwad-ku qaadiddu maxkamadda yimaadaan, in la qiimeeyo baahiyahooda si ay cadaymahooda ugu bixin karaan si waxtar leh iyo in lagu wargeliyo wixii ka soo kordha kiiskooda iyo natiijadiisa.

cadaymo hab-dhaqan xun ama cadaymo waxyaalo dadku isu sheegsheegeen ah
ama qoraal ku smayno sababta ay ugu muuqato in dhamaan dalabyadaas aan loo baahnayn;

c) qeexnaa sida ay tahay in kiiska loo soo bandhigo si loo cadeeyo dhamaan qaybaha kala duwa ee dembiga dacwaddu lagu soo oogey, iyo sida wax looga qabanayo wixii difaac ah ama daciifnimo ah ee ay u badan tahay inay jiraan;

d) bixinaynaa nuqul ah go'aankii xukun-ku qaadid ee dacwad-qaadaha, ama kiisaska ay booliisku dacwad-ku qaadaha xukumaan iyagoo aan ogolaansho ka haysan dacwad-qaadaha, go'aanka dacwad-qaadaha ee inuu kiiska aqbalo;

e) Tilmaan ka bixinaa wixii adeegsi sharci oo aan caadi ahayn ah oo laga yaabo inuu kiiska saamayn ku yeesho;

f) sharaxnaa wixii shaqo dheeraad ah ee aanu gacanta ku hayno;

g) u-doodaha ka codsanaa inuu si dhakhso ah u soo gudbiyo wixii talaabooyin dheeraad ah ee uu u malaynayo inay xoojinayaan kiiska ama si ka waadixsan maxkamadda loogu soo bandhigo;

h) tilmaan ka bixinaa, haddii ay jiraan, qirashooyin kale oo aanu diyaar u nahay in aanu dacwad-iska difaacaha ka aqbalo; aqoonsanaa wixii arimo gaar ah ee kiiska la xidhiidha ee u baahan dareenka u-doodaha ka hor kulan-doodeeddka maxkamadda, sida dalabyada in la helo ama la ilaaliyo qarsoodinimada warbixinaha;

i) qaraal ku samaynaa in dacwad-iska difaacuhu xabsi ku jiro iyo in kale iyo mudada ay xabsi ku hayntu ku eeg tahay, haddii uu damiin ku jiro, maxaa shuruudo ah oo maxkamaddu ku xidhay;

j) sharaxnaa in markhaati amar ama mid ogolaansho ay u badan tahay in loo baahan yahay, si loo hubiyo imaanshaha markhaati yimaado maxkamadda, ama sababaha ay ugu badan tahay in aan loo baahnayn;

k) weydiinaa u-doodaha inuu go'aamiyo sida ay u kala horaynayaan ee markhaatiyada dacwad-ku qaadiddu cadaymahooda u bixin doonaan, si aanay maxkamadda u imaan wax ka badan mudada loo baahan yahay;
l) samaynaa taariikhaha wixii cadaymo ah ee dhiman loo filayo in la helo, gaar ahaan kuwa cilmiga sayniska ku salaysan (scientific) ama cadaymaha kale ee khibradeed; iyo

m) bixinaa faahfaahina wadaxidhiidh ee dacwad-qaadaha iyo sarkaalka sharciyeed ee kiiska ka mas'uulka ah.

5.18 Waxaanu samaynaa wixii shaqo dheeraad ah oo u-dooduhu soo jeediyo in loo baahan yahay, si loo hubiyo in kiiska si buuuxda loo diyaariyey.

Warbixino Dacwad-iska difaacayaasha la siiyo si loo hubiyo kulan-doodeed maxkamaddeed oo cadaalad ah

5.19 Booliiska iyo dembi-baadhayaasha kale waxaa looga baahan yahay inay diyaariyaan jadwalo ah dhamaan waxyaalaha la xidhiidha ee la ururiyey xiligii dembi-baadhista, ee aan loo isticmaalin inay qayb ka noqdaan cadaymaha dacwad-ku qaadidida iyo inay jadwalka noo soo gudbiyaan.

5.20 Waxaanu ka fekernaa jadwalka si aanu u go'aamino in wax ka mid ah shay'yada la taxay:

a) ay tahay in loo isticmaalo qayb ka mid ahcadayn dacwad-ku qaadid;

b) laga yaabo inay carqalad ku keento dacwad-ku qaadidda;

c) laga yaabo inay taageerto kiiska dacwad-iska difaaca; iyo

d) in wax iyada ka mid ahi ay yihiin xasaasi oo ay tahay inaan kooxda dacwad-iska difaaca la siin.

5.21 Waxaanu booliiska ama dembi-baadhayaasha kale ka codsanaa nuqulo ah wixii shay'yo laga yaabo inuu hoos yimaado mid ka mid ah qaybahaas, si aanu ka fiirsi intaa ka badan ugu samayno.

5.22 Waxaanu qoraal ku xafidnaa go'aanadayada shay walba oo jadwalka ku jira, anagoo mid walba sabab siinayana. Waxaanu jadwalka u dirnaa kooxda dacwad-iska difaaca, si ay ugu warqabaan dhamaan waxyaalaha la hayo, marka laga reebo kuwa ah kuwo aad xasaasi u ah oo aanay ahayn in la sheego jiritaankooda.

5.23 Waxaanu sida ugu dhakhsaha badan ee loo hawlgeli karo kooxda dacwad-iska difaaca siinaa nuqulo ah waxyaalaha aan xasaasiga ahayn ee aan la isticmaalin ee laga yaabo inay carqaladdeeyaan kiiska dacwad-ku qaadidda ama ay taageeraan kiiska dacwad iska difaaca ama, haddii ay tahay mid aan hawlgal ahaan ka sawiri karin, ku martiqaadnaa inay baadhitaan ku sameeyaan, badanaa saldhiga booliiska gudahiisa.

5.24 Haddii ay warbixinuhu yihiin kuwo xasaasi ah oo aanay ahayn in kooxda dacwad-iska difaaca la tuso, lagana yaabo inay carqaladdeeyaan kiiska dacwad-ku qaadidda ama ay taageeraan kiiska dacwad iska difaaca, waxaa laga yaabaa in aanu maxkamadda ka codsano inay go'aan ka gaadho in ay tahay in loo soo bandhigo ama in la hayn karo.

5.25 Waxaanu su'aasha ah soo bandhigidda ku samaynaa dib-uga fiirsasho joogto ah, inta uu kiisku socdo oo dhan, iyo markaa ka dibba, haddii la helo warbixino cusub oo laga yaabo inay carqaladdeeyaan kiiska dacwad-ku qaadidda ama ay taageeraan kiiska dacwad iska difaaca. Waxaanu mar kale ka fekernaa go'aanada soo bandhigidda, marka ay kooxda dacwad-iska difaaciddu noo sheegaan kiiskooda, oo ay ka mid yihiin in booliiska ama dembi-baadhayaasha kale ay ka hadlaan warbixinaha laga hely kooxda dacwad-iska difaaca.

Xadidaadaha mudooyinka xabsiga

5.26 Dacwad-iska difaacayaasha waxa lagu hayn karaa xabsi inta la sugayo u gudbinta kulan-doodeedka maxkamaddeed mudo kooban oo keliya ilaa haddii mooyee ay maxkamaddu aqbasho in wakhtiga la kordhiyo.

5.27 Haddii Dacwad-iska difaace xabsi la geeyo, u-dooduha kulan-dhegaysiga maxkamaddeed ee ugu horeeya iyo wixii kulan-dhegaysi kasta oo ka dambeeya ah, wuxuu maxkamadda ugu baaqi doonaa taariikhda uu ku eg yahay wakhtiga xabsiyidda ee la xidhiiidha.

5.28 Waxaanu warbixintan ku qornaa faylkayaga kiiska, dabadeedna waxaanu qoraal ahaan ugu xafidnaa taxanahayaga xadidaadaha wakhtiyada xabsiyidda.

5.29 Waxaanu mudnaan kala siinaa diyaarinta kiisaska xabsiyidda, si aanu u hubino in kulan-doodeedka maxkamaddu ee gudbintu ku bilaaban karo wakhtiga xadidaada ee xabsiyidda gudaheeda, ama in aanu odhan karo in aanu ku hawlgalay si ay ku dheehan tahay il-dheergaradnimo iyo hawlqabad haddii ay daruuri noqoto in maxkamadda laga codsado inay kordhiso wakhtiga la xadidey.

5.30 Waxaanu dib-uga fiirsi ku samaynaa taxa mudooyinka wakhti ee xadiddan ee xabsiyidda iyo hanaankayaga maaraynta kiisaka ee kumbiyuutarka ku salaysan si aanu ugu fiirsano marka uu wakhti xadiddan oo xasiyid ay soo dhowdahay. Maamula sharci oo la soo magacaabay ama dacwad-qaade derajo sare leh ayaa ugu yaraan isbuuciiba mar ka fiirsada wixii kiisas ah ee ay baadhitaanadaasi aqoonsadaan. Wakhti xadiddan gudahiis oo ah ka hor inta aan mudadaasi dhamaan, waxaanu maxkamadda iyo kooxda dacwad-iska difaaca u dirnaa ogaysiis haddii ay u muuqato in aan kiisku bilaabanayn wakhtiga xadiddan gudahiisa, si maxkamaddu ugu fekerto in la bixiyo kordhin iyo in kale. Waxaanu bixinaa sidii ay dhacdooyinku u kala horeeyeen, si aanu caawimo maxkamadda uga siino inay dacwad-ku qaadiddu u hawlgashay si ay ku dheehan tahay il-dheergaradnimo iyo hawlqabad

5.31 Maamulayaasha ayaa u fiirsada cabashooyinka hanaanka isbuuc walba, oo balanqaad qoraal ah oo ku saabsan hanaanada lagu shaqaynayo siiya Madaxa Dacwad-ku qaadidda Maxkamaddeed.

Heerka 6

Waxaanu kiisaskayaga u soo bandhigi doonaa si cadaalad ah oo adag.

Samayna kulan-dacwadeedka maxkamadda[11]

6.1 ka hor kulan doodda maxkamadda, u-dooduhu:

a) wuxuu ka fekeri doonaa taariikhda buuxda ee kiiska, oo ay ku jiraan qoraalada dib-uga fiirsi ee kulan-dacwadeedka maxkamadda, si uu u hubiyo in wax walba si sax ah loo diyaariyey;

b) wuxuu, markii ay suurtogal tahay kiiska kala xaajood doonaa sarkaalka demb-baadhista wada, si uu u hubiyo in inuu ogyahay dhamaan waxyaalaha hore looga hayey kiiska;

c) wuxuu diyaarinayaa, dhamaan marka laga reebo kiisaska ugu sahlan, hadal furitaan oo kooban ama qeexitaan ah cadaymaha, si uu maxkamadda hoose ama gudiga garwadeenada ugu caawiyo inay fahmaan waxa uu kiisku ku saabsan yahay, haddii uu dacwad-iska difaacuhu qirto dembiilenimo, inay ka caawiyaan maxkamadda hoose ama xaakimka xukun ku qaadidda dembiilaha;

d) wuxuu diyaarinayaa qorshe ku meelgaadh oo baadhitaan isweydaar ah (cross-examination) oo lagu sameeyo dacwad-iska difaacaha ama cidii kale ee markhaati u ah kooxda dacwad-iska difaacaha;

e) wuxuu diyaarinayaa qeexitaan qoraal ah oo ah wixii dood sharci ah ee loo gudbinayo xeerilaaliyayaasha maxkamadda ama xaakimka; iyo

f) wuxuu go'aan ka gaadhi doonaa amarka ay markhaatiyada dacwad-qaadiddu cadayntooda kiisaka Maxkamadda Sare iyo maxkamadda hoose kaga bixin doonaan, kiisaska ay u badan tahay inay qaataan wax ka badan hal maalin, si aanay khasab u noqon inay maxkamadda yimaadaan wax ka badan mudada loo baahan yahay.

6.2 U-dooduhu wuxuu maxkamadda soo gaadhaa xili uu kula kulmi karo markhaatiyada oo uu:

a) is barahso ula sameeyo;

b) u tuso, ama u qorsheeyo in qof ka socda Adeegga Markhaatiga[12] uu tuso qoraaladooda markhaati (ama waraysigoodii muuqaal ahaanta

[11] Adeegga dacwad-ku qaadiddu wuxuu sameeyey heerarka laga fili karo u-doodayaasha maxkamadda yimaada kuwaas oo iyaga metalaya, heerarkaas waxaa lagu qoray *Heerarka U-doodidda ee Qaranka* (*National Standards of Advocacy*), kuwaas oo laga heli karo bogayaga internet-ka (www.cps.gov.uk) ama in la codsado (faahfaahin ka eeg jeldiga xagga dambe).

loo duubay, haddii aan tan hadeerba la samayn) si ay xusuustooda u soo cusboonaysiiyaan ka hor inta aanay bixin cadaynta;

c) u sharaxo waxa maalintaas dhici doona, oo ay ka mid yihiin saamaynta ay wixii qaabab gaar ah oo ay maxkamaddu aqbashay si looga caawiyo inay cadayntooda bixiyaan; iyo

d) ka jawaabo wixii su'aalo ah ee sharcigu ogolaanayo ee laga yaabo inay qabaan.

6.3 Hase yeeshee, iyadoo la raacayo xeerarka xirfaddooda, u-doodayaashu markhaatiga kalama hadli karaan cadaymahooda, ama uma sheegi karaan cadaymaha laga yaabo inuu markhaati kale bixiyo.

6.4 Maalinta doodda maxkamadda, u-dooduhu:

a) wuxuu kiiska dacwad-ku qaadidda u soo bandhigi doonaa si furan, daacad ah oo sumcad leh, isagoo u adeegaya danaha cadaaladda ee aan ahayn ujeedo ah in xukun la qaado oo keliya;

b) wuxuu markhaatiyada dacwad-ku qaadidda la socodsiinayaa – isagoo ula socodsiinaya si toos ah ama haddii aanu qolka maxkamadda ka bixi karin, isagoo u sii marinaya caawiye ama sarkaal maxkamaddeed – sababaha wixii habsaan ah ee yimaada;

c) wuxuu maxkamadda gudaheeda markhaatiyada iyo dacwad-iska difaacayaasha ula dhaqmi doonaa si ixtiraam leh, wuxuuna maxkamadda ka codsan doonaa inay soo dhexgasho oo joojiso wixii su'aalo aan munaasib ahayn ah ee ay keenaan markhaatiyada dacwad-qaadiddu; iyo

d) inuu maxkamadda ka dalbado ogolaansho uu markhaatiga dacwad-ku qaadiddu maxkamadda kaga baxo isla marka ay cadayntooda bixiyaanba, haddii ay doonayaan inay sidaas sameeyaan, ilaa haddii mooyee ay jiraan sababo daruuri ah oo ay tahay inay halkaa sii joogaan.

6.5 U-dooduhu wuxuu sidoo kale shakhsi ahaan ama isagoo caawiye u kaashanaya:

a) wakhatiyada ku haboon qorsheeyaa samaynta waxyaalaha cadaymaha loo isticmaalayo;

b) wadashaqayn la sameeyaa markhaatiyada dacwad-qaadidda, si loogu heli karo inay cadaymo bixiyaan wakhtiga saxda ah, iyo in aanu la socodsiino wixii habsaamid ah; iyo

[12] Adeegga Markhaatigu wuxuu qayb ka yahay hay'adaha samafalka ee qaranka, ee markhaatiyada siiya gargaar ka hor iyo inta ay socoto dooda maxkamada ee dembi.

c) samaynaa wixii dhamaystirid marka ugu dambaysa ah oo dukumeentiyo loogu baahan yahay go'aano maxkamaddeed oo doodo sharciyeed.

6.6 Haddii dacwad-iska difaacaha la xukumo, u-doodaha dacwad-qaadiddu wuxuu garwadeenada maxkamdda ama xaakimka ka caawiyaa hanaan-hawleedka xukun-ku qaadidda, iyo markii ay noqoto in xukunka la hakiyo, go'aanada ku saabsan in dembiilaha xabsiga lagu sii hayo inta xukunku dhacayo iyo in kale. Waxaanu wax intaa ka badan oo ku saabsan doorka dacwad-qaadaha ee xukun-ku qaadidda ku sheegnaa heerka 9 gudahiisa.

U hawlgelidda bixinaha qirashooyin dembiilenimo[13]

6.7 Dacwad-iska difaacayaal badan waxay sameeyaan qirasho dembiilenimo oo ah qaar ka mid ah tiro dembiyo ah, dembi ka duwan, ama mid ku salaysan qayb gaar ah oo ka mid ah dhacdoodyin. Tani badanaa waxay dhacdaa marka ugu dambaysa, inta badan wax yar ka hor marka ay tahay inuu kulan-doodeedka maxkamaddu bilawdo. Mar kasta oo ay dhacdo, waxaanu:

a) waxaanu xisaabta ku darnaa marka aanu marka aanu go'aan ka gaadhayno inay tahay danaha dadweynaha in qirashada la aqbalo, wixii fekero ah ee uu dhibanahu soo jeediyo ama qoyskiisu soo jeediyo;

b) hubinaa in maxkamaddu ay qaadi karto dembi u dhigma inta ay leegtahay weynaanta falka dembi, iyadoo xisaabta lagu darayot feradaha laga qaadanayo qirashada la soo jeediyey ee helitaanka amarro kabideed oo munaasib ah. Waxaanu hubinaa inaan sababaha loo soo jeediyey qirashada aanay ku salaysnayn xaqiiqooyin wax luminaya ama been ah aanayna dhibaato ku ahayn danaha dhibanaha. Haddii aan heshiis laga gaadhi karin sababaha qirashada, waxaa laga yaabaa in u-dooduhu maxkamadda ka codsado inay cadaymaha dhegaysato si ay go'aan uga gaadho sababaha dembiilaha xukunka loogu qaadayo; iyo

c) in aanu hubino wixii sababo laysla ogolaaday ee qirasho ah in la qoray, oo ay saxeexeen u-doodayaasha kooxda dacwad-iska difaca iyo dacwad-qaadiddu.

[13] *Hagayaasha Qareenka Guud ee Aqballidda Qirashada iyo Doorka Dacwad-qaadaha ee Hanaan-hawleedka Xukun ku qaadidda waxay maxkamaddaha, dacwad-qaadayaasha iyo qareenada dacwad-iska difaaca siiyaan gahitaan faahfaahsan oo arimahan ah. Waxaa laga heli karo bogayaga internet-ka www.attorneygeneral.gov.uk ama in la codsado (faahfaahin ka eeg jeldiga xagga dambe).*

Heerka 7

Waxaanu qiimayn doonaa baahiyaha dhibanayaasha iyo markhaatiyada, waxaanuna la socodsiin doonaa wixii ka soo khordha kiiskooda, waxaanuna raadin doonaa gargaarka munaasibka ah ee ka caawinaya inay bixiyaan cadaymahooda ugu wanaagsan[14].

7.1 La macaamilkayaga aanu la macaamilayno dhibanayaasha iyo markhaatiyada, waxaanu ahmiyad gaar ah siinaa waajibaadkayaga ah in aanu o ololayno u sinaanta helitaanka cadaalad.

7.2 Sarkaal Daryeel Markhaati (Witness Care Officer), ama kiisaska gaarka ah, sarkaal booliis ama Sarkaal Tacsi Qoys (Family Bereavement Officer)[15], ayaa loo qoondayn doonaa kiis walba, kaas oo noqonaya shakhsi keli ah oo ay dhibanayaasha iyo markhaatiyadu la xidhiidhaan, laga bilaabo marka ugu horaysa ee maxkamadda la yimaado ilaa dhamaadka kiiska. Wuxuu dhibanahyaasha iyo markhaatiyada ku wargeiyaa wixii ku saabsan waxa kiiska ka soo kordha marxalad kasta oo ka mid ah hab-socodka maxkamadda, wuxuuna raadin doonaa inuu hubiyo in baahiyahooda la daboolo. Wuxuu sidoo kale hubinayaa in dhibanahu sameeyey, ama la weydiiyey inuu doonayo inuu sameeyo Qoraal Dhibane oo Shakhsiyeed, oo maxkamadda horteeda laga akhriyo haddii dacwad-iska difaacuhu uu qirto dembiilenimo ama xukun lagu qaado.

7.3 Haddii uu dacwad-iska difaacuhu sheegto inuu dembi la'aan yahay, Sarkaal Daryeel Maxkamaddeed ayaa:

a) mudo wakhti xadiddan gudaheed ah ku ogaysiiya markhaatiyada loo baahan yahay inay cadaymo bixiyaan taariikhda kulan-doodeedka maxkamaddeed, mudadaas kooban oo ka bilaabata marka warbixinahan laga helo adeegga dacwad-qaadidda;

b) ma dib qirasho dembiilenimo, siiya markhaatiyada looga baahnaa inay maxkamadda yimaadaan, qiimayn buuxda oo baahiyeed. Tani waxay siisaa fursad ay kaga hadlaan welwelada ay ka qabaan imaanshaha maxkamadda, oo ay ka mid yihiin, tusaale ahaan, in laga caawiyo arimaha daryeel caruureed iyo safarka. Waxay sidoo kale Sarkaalka Daryeel Markhaati awood u siisaa inuu markhaatiga la lafaguro in ay jirto baahi loo qabo qaabab gaar ah si awood loogu siiyo inuu cadayntiisa u bixiyo si waxtar leh;

[14] Sidoo kale arag Wacadka Dacwad-qaadaha (Prosecutor's Pledge), Qoraalka Xeerarka CPS ee Dhibanayaasha iyo Markhaatiyada, Hanaanka Hawlgal ee Dhibanayaasha Dembiga iyo Heshiiska markhaatiga, dhamaan waxaa laga heli karo bogayaga internet-ka (www.cps.gov.uk) ama in la codsado (faahfaahin ka eeg jeldiga xagga dambe).

[15] Sarkaalada Tacsiyeynta Qoyska (marmarka qaarkood loo yaqaan Sarkaalada La-shaqaynta Qoyska) waa sarkaalo booliis oo si gaar ah loo tababaray oo bixiya isku xidh u dhexeeya dembi-baadhayaasha, dacwad-qaadayaasha iyo qoyska dhibanaha ee kiisaska dhimashada ku lug leh.

c) samaynayaa qorshayaal gaar ah, haddii loo baahdo, kuwaas oo loo samaynayo markhaati leh kaladhantaalnaan jidheed, markhaati qaba dhibaatooyin caafimaad iyo kuwa u baahan caawimo xagga wadahadalka ah, sida in turjumaan la keeno, iyadoo maxkamadda ogolaansho la weydiisanayo markii loo baahdo;

d) haddii ay munaasib tahay, markhaatiga u gudbiyaa urur kale, sida kooxaha gargaar ee la xidhiidha, kuwaas oo bixiya caawimo gaar ah oo qaabkaas u qorshaysan; iyo

e) markaatiga ku xidhaa Adeegga Markhaatiga[16], kaas bixiya gargaar hawlgal iyo mid niyadeed oo ka sii horeeya kulan-doodeedka maxkamadda, maalinta uu kulan-doodeedka maxkamaddu dhacayo, iyo, kiisaska ku haboon, intaa ka dib, oo ay ka mid yihiin in markhaatiyada la siiyo fursad ay maxkamadda ku soo booqdaan ka hor taariikhda kulan-doodeedka maxkamadda, si looga caawiyo inuu fahan ka wanaagsan ka qaato hanaan-hawleedka maxkamadda iyo inuu maalinda kulan-doodeedka maxkamadda dareemo debecsanaan/xasilooni. Gargaaradan qaarkood waxaa laga yaabaa inuu bixiyo Gargaarka Dhibanaha.

7.4 Sarkaalada Daryeel Markhaati ayaa sameeya hawlo kuwan ku dhow, marka markhaati loo baahan yahay inuu maxkamad sare u tago kulan – dhagaysi racfaan.

7.5 Marka kiis la soo gababeeyo, Sarkaal Daryeel Markhaati ayaa dhibanayaasha iyo markhaatiyada mudo wakhti cayiman gudahood ah oo ka bilaabata marka uu natiijada maxkamadda ka helo, ku soo ogaysiiya natiijada, isagoo ugu soo gudbinaya qaabka ay dooraan in loola soo xidhiidho. Waxay sidoo kale weydiinayaan inay u baahan yihiin wax caawimo ah oo ay ka helaan adeeg gargaar oo la xidhiidha.

7.6 Kiisaska munaasibka ku ah, dacwad-qaadayaashu waxay markhaatiga u ogolaadaan inuu qof ahaan ula kulmo si uu ugala xaajoodo baadhiyahooda u baahan qaabab gaar ah.

7.7 kiisaska qaar khaas ah ayaanu maxkamadda ka codsanaa ogolaansho ah inay qarisho aqoonsiga markhaati marka tan lagu qancin karo.

7.8 kiisaska dhimasho ku lug leh, dacwad-qaaduhu wuxuu xili hore u soo bandhigaa qoyska dhibanaha inuu la kulmo, si uu ugu sharaxo sida kiiska loogu hawlgelayo iyo waxa la filayo inay dhacaan kulan-dhegaysi maxkamaddeed oo walba[17].

[16] Adeegga Markhaatigu wuxuu qayb ka yahay hay'adaha samafalka ee qaranka, ee markhaatiyada siiya gargaar ka hor iyo inta ay socoto dooda maxkamada ee dembi.

[17] Kan waxaa loo yaqaanaa qorshaha Ahmiyad siinta Dhibanaha. Faahfaahin dheeraad ah ayaa laga heli karo bogayaga internet-ka (www.cps.gov.uk) ama in la codsado (faahfaahin ka eeg jeldiga xagga dambe).

Heerka 8

Waxaanu go'aanadayada u sharixi doonaa dhibanayaasha marka aanu kiisas joojino ama wax weyn ka bedelo xukunka.

8.1 Marka aanu qorshaynayno in aanu kiis joojino, ama aanu wax weyn ka bedelo dacwadda lagu qaadayo, waxaanu la tashanaa booliiska iyo dembi-baadhayaasha kale, ilaa haddii mooyee aanay in sidaasi la sameeyaa hawlgal ahaan suurtogal ahayn, ka hor inta aanan gaadhin go'aanka kama dambaysta ah. Marka aanu qorshayno in go'aan ku salaysan yahay sababo danaha dadweynaha ah, waxaanu xisaabta ku darnaa wixii fekraddo ah ee uu dhibanahu soo jeediyo, ee ku saabsan saamaynta uu falka dembi ku yeeshay. Kiisaska ku haboon, tusaale ahaan, kiiska dilka qudhgooyada ah ama marka uu dhibanuhu yahay ilme yar ama qof weyn oo aan xiskiisu dhamayn, sida ku qeexan Sharciga Awoodda Maskaxeed ee 2005 (Mental Capacity Act 2005), dacwad-qaadayaashu waa inay xisaabta ku daraan fekradaha ay soo jeediyaan dhibanaha qoyskiisu.

8.2 Marka uu dacwad-qaade go'aan ku gaadho inuu kiis joojiyo ama uu wax weyn ka bedelo dacwadda lagu qaadayo dacwad-iska difaace, wuxuu warqad ugu diraa dhibanaha mudo wakhti oo xadidan gudaheed, si uu ugu sharaxo sababaha go'aankiisa. Warqadda waxaa loo qaabeeyey baahida dhibanaha iyo xaaladda gaarka ah ee kiiska.

8.3 U-dooduhu waa inuu weji-ka-weji ula hadlaa dhibanayaasha daciifka ah/dagan ama la handadey haddii ay maxkamadda joogaan maalinta go'aanka la gaadhayo, ka hor inta aanan warqad u dirin.

8.4 Dacwad-qaadayaashu waxay dembiyada qaarkood dhibanayaasha u soo bandhigaan inay qof ahaan ula kulmaan, si ay su'aalahooda la xidhiidha sharaxaaddayada qoraalka ah uga jawaabaan.

8.5 Mabaadii kuwaas ku dhow ayaa loo isticmaalaa kiisaska waaweyn ama dhinacyada badan leh, marka aanu go'aan ku gaadhno in aanan booliiska ama dembi-baadhayaasha kale u ansixin inay eedaysane xukun ku qaadaan, in kasta oo kiisaska intooda badan ay booliiska ama dembi-baadhayaasha kale bixiyaan sharaxaadda.

Heerka 9

Waxaanu maxkamadda ka caawin doonaa hanaan-hawleedka xukun-ku qaadidda iyo hanti kala wareegidda hawl-waxqabadyada dembiga[18].

9.1 Xukumiddu waa mas'uuliyadda maxkamadda. Doorka ay dacwad-qaadiddu ku leedahay xukumidda waa inay maxkamadda ka caawiso hanaan-hawleedka xukun-ku qaadidda, iyagoo la socodsiinaya dhamaan warbixinaha la xidhiidha.

9.2 Ka hor kulan-maxkamaddeedka xukunka lagu qaadayo:

a) waxaanu Adeegga Damaanadda Shuruudaysan ama Adeegga Dembiilayaasha Dayarta ah siinaa xog kooban oo kiiska ah, si ay maxkamadda ugu diyaarin karaan warbixin macquul ah oo xukunka ka hor ah;

b) Sarkaal Daryeel Markhaati ayaa ka codsada ama u qorsheeya sarkaal booliis ama dembi-baadhayaasha kale inay dibanaha weydiiyaan inuu doonayo inuu sameeyo Qoraal Shakhsiyeed ee Dhibanaha ama ay dib u habeeyaan mid ay hore u bixiyeen;

c) kiisaska ay u badan tahay in xukunada la qaadayaa ay noqon doonaan kuwo dhinacyo badan, ama aan si fiican loo aqoonin, ama marka ay maxkamaddu in aanu sidaa yeelo naga dalabto, waxaanu diyaarinaa qoraal aanu maxkamadda u soo gudbino, oo sheegaya bixinta iyo hagayaasha xukunada la xidhiidha, wixii amarro kabid ah jira iyo wixii warbixino khuseeya ah ee aan weli maxkamadda laga goayn; iyo

d) marka loo baahdo, waxaanu diyaarinaa dalab qoraal ah oo loo sameeyo wixii amarro kabid ah, sida Amarro Dhaqamada Bulshada Dhibka ku ama Amaro Xakamayn ee munaasib ah;

9.3 Xiliga kulan-maxkamaddeedka u-dooduhu:

a) wuxuu maxkamadda u qeexaa xaqiiqooyinka kiiska, isagoo dareen u soo jeedinaya wixii arrimo sii adkaynaya falka dembi iyo wixii arimo sahlaya ah ee ka dhex muuqda kiiska dacwad-ku qaadidda;

b) wuxuu maxkamadda siiyaa markii ay munaasib tahay, liis ah falalka kale ee dembi ee uu dacwad-iska difaacuhu doonay in xisaabta lagu daro, si ay maxkamaddu xukunka uga muujin karto[19];

---

[18] *Hagayaasha Qareenak Guud ee Odhaahaha Aqbalidda iyo Doorka dacwad-qaadaha ee Hanaanka Xukun-qaadidda wuxuu maxkamadda qareenka dacwad-iska difaacaha iyo dadweynaha hagid faahfaahsan ka siiyaa arintan*. Waxaa laga heli karaa bogga ineternet-ka www.attorneygeneral.gov.uk ama inaad codsato (faahfaahin ka eeg jeldiga xagga dambe).

[19] Haddii dacwad-iska difaace uu diido inuu dembi maxkamadda ka qirto, kaas oo uu hadda ka hor muujiyey inuu maxkamadda ka codsanayo inay ka fiirsato, dacwad-qaadayaasha ayaa ka baaraandegi doona in ay tahay in lagu xukumo iyo in kale, iyagoo u sharaxaya u-doodaha dacwad-iska difaacaha in laga yaabo in falka dembi dib-uga fiirsi dheeraad ah lagu sameeyo.

c) wuxuu maxkamadda ku wargelin doonaa wixii falal hore oo dembi ah, digniino sahlan[20] ama digniino shuruudaysan ee laga hayo dembiilaha. Isagoo si gaar ah dareen ugu soo jeedinaya kuwa ka hadda dacwadu ka socoto ku dhow;

d) maxkamadda la socodsiin doonaa natiijooyinka wixii baadhitaan daroogo ah ee lagu qaaday saldhiga booliiska; iyo

e) inuu hubiyo in warbixinta xukunka ka hor ah ay ku salaysan tahay qiimayn sax ah oo cadaynta ah iyo, haddii aanay sidaas ahayn, wuxuu tan u soo jeediyaa dareenka maxkamadda.

9.4 U-doodayaashu waxay sidoo kale dareen u soo jeediyaan saamaynta uu hab-dhaqanka dembiiluhu keenay, isagoo:

a) maxkamadda usoo bandhigaya Qoraalka Shakhsiyeed ee Dhibanaha, haddii la heli karo;

b) maxkamadda ka codsanaya inay dembiilaha ku amarto inuu dhibanaha magdhaw siiyo, markii ay munaasib tahay; iyo

c) bixinaya cadayn ah saamaynta ay samaynta falka dembi ku yaalatay bulshada, markii ay munaasib tahay.

9.5 U-dooduhu wuxuu hubiyaa in maxkamaddu ka fekerto dhamaan kala doorashooyinka xukunada ee ay qaadan karto, isagoo:

a) maxkamdadda ka codsanaya inay ka fekerto amarro kabid ah oo lagu xukumo dembiilaha, si loo yareeyo fursadda uu fal dembi oo kale ku sameeyo mustaqbalka ama in dhibanaha laga ilaaliyo fal dembi oo mustaqbalka lagula kaco. Kuwaa waxaa ka mid ah Amarro Dhaqamada Bulshada Dhibka ku ah, Amarro Xakamayn, ka mamnuucid gaadhiid wadid iyo Ammaro Ka hortag Dembiyo Galmo;

b) Ka doodayaa wixii fududaynaya dacwad iska difaacidda ee ku xumayn ku ah dabeecadda dhibanaha, been ah ama aan khusayn ka baaraandegidda saxda ah ee xukun qaadidda;

c) maxkamadda ka codsayaa inay ka fekerto burburinta waxyaalaha sida daroogada ama hubka kuwaas oo uu hayey dembiiluhu ama loo isticmaalay falka dembi;

[20] Dembiilayaash da'yarta ah lama siin karo digniin sahlan. Hase yeeshee, waxaa laga yaabaa in la siiyo Canaan iyo Digniin Kama dambays ah. Waxaanu si ku haboon erayga digniin (caution) Heerarkan gudahooda ugu isticmaalaa in aanu sidoo kale qaybahaasna tixraacno. Dambiilayaasha da'yarta ah waxaa laga yaabaa in la siiyo digniin shuruudaysan.

d) Si guud maxkamadda uga caawiyaa hanaan-hawleedka xukun-qaadidda, isagoo dareenka maxkamadda u soo jeedinaya wixii khuseeya ee sharci la bixiyo ah, hagayaasha xukun qaadidda iyo hagayaasha kiisaska, oo ay ku jiraan inuu u tilmaamo xaaladdaha, sida haddii uu falka dembi ahaa Dembi Asal-nacayb , haddii uu sharcigu maxkamadda uga baahan yahay inay ku baaqdo wixii kordhin xukun ay qaaday ah; iyo

e) u-doodaha waxaa sidoo kale laga yaabaa inuu maxkamadda ka caawiyo inuu qeexo, isagoo ticraacaya arimaha ku qoran tuducda qoraal ee 9.3 iyo 9.5, cabirka noocyada xukun ku qaadid ee uu falka dembi ee markaa taagani hoos imaanayo.

9.6 Intaa waxaa dheer in u-dooduhu uu maxkamadda ka dalban doono inay dembiilaha ku amraan inuu bixiyo dhamaan ama qayb ka mid ah kharashkii kiiska kaga baxay maxkamadda, ilaa mooyee inay jirto sabab wanaagsan oo aan sidaa loo samaynayn.

9.7 Dacwad-ku qaadiddu ma laha awood ay racfaan kaga qaataan xukunada. Laakiin tiro kooban oo kiisas Maxkamadda Sare ah, Qareenka Guud wuxuu xukunka u gudbin karaa Maxkamadda Rafcaanka inuu ahaa mid debecsanaan aan caadi ahayn ah –haddii aynu si kale u sheegno, inuu xukunku yahay mid ka baxsan heerka uu xaakim si macquul ah ugu arki lahaa inuu yahay munaasib. Sida ugu horaysa ee suurtogalka ah ee xukunka ka dib ah, waxaanu ku go'aansanaa in aanu ka codsanao Qareenka Guud inuu sidaa sameeyo. Qareenka Guud wuxuu sidoo kale ka fiirsanayaa bedel uu isagu iskuu u sameeyo ama uu dhibanuha ama xubin dadweynah ahi ka codsado. Haddii uu Qareenka Guud gao'aan ku gaadho inuu bedelo xukuna, waa inuu sidaa ku sameeyaa 28 maalmood gudahood.

9.8 Sarkaal Daryeel Markhaati ayaa ogaysiiya wixii dhibanayaal iyo markhaatiyo ah xukunka ay maxkamaddu qaaday, isagoo ku ogaysiinaya mudo wakhti gaaban ah gudaheed, oo ay ku jiraan sharaxaad ah waxa uu xukunka macnihiisu yahay oo ku qoran luuqad si fudud loo fahmayo.

Hanaanka hanti kala wareegidda dembiga

9.9 Marka uu eedaysane ama dacwad-iska difaace uu kiisaska qaarkood faa'iido ka helay dembiga uu galay, ayna jirto cabsi laga qabo inuu isticmaalo ama ka takhaluso hantida, waxaanu xaakimka ka codsanaynaa inuu sameeyo Amar Xakamayn, oo uu ku sameeyo muddo wakhti gaaban ah oo ka bilawda marka ay booliiska ama dembi-baadhayaasha kale codsadaan, si looga ilaaliyo in eedaysanaha ama dacwad-iska difaacuhu uu isticmaalo ama ka takhaluso. Waxaanu sidoo kale booliiska ama dembi-baadhayaasha kale u sheegnaa marka aanu ka fekerayno in Amar Xakamayn laga yaabo inuu yahay munaasib. Sida ugu dhakhsaha badan ka dib marka la sameeyo

Amarka waxaanu nuqul amarka ah u dirnaa eedaysanaha ama dacwad-iska difaacaha iyo ururada la xidhiidha, sida bangiyada iyo iskaashatooyinka bulshada, kuwaas oo awood u leh inay joojiyaan in uu eedaysanaha ama dacwad-iska difaacuhu isticmaalo hantida. Marmarka qaarkood, waxaanu booliiska ama dembi-baadhayaasha kale ka codsanaa inay tan iyagu noo sameeyaan.

9.10 Waxaanu ka fekernaa in kiisaska kale ee aanu ka helo booliiska ama dembi-baadhayaasha kale laga yaabo inay ku haboon yihiin qaab-hawleed hanti la wareegid oo la xidhiidha dembiga dacwad-iska difaacaha. Haddii uu kiis u muuqdo inuu yahay mid ku haboon, waxaanu isla markiiba booliiska ama dembi-baadhayaasha kale weydiinaa inay soo ogaadaan in uu leeyahay hanti ku filan in maxmadda laga dalbo in hantida lala wareego.

9.11 Marka dacwad iska difaace la xukumo, ayna u muuqato ina munaasib tahay in la raadsado hanaanhawleed hanti kale wareegid la xidhiidha dembigiisa, waxaanu maxkamadda ka codsanaa inay jadwal u samayso hanaan-hawleedka hanti kala wareegidda, ilaa mooyee inuu kiisku yahay mid sahlan hanti la wareegidduna ay dhici karto isla xiliga dembiilaha la xukumayo.

9.12 Sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah ka dib marka jadwalka la sameeyo, waxaanu booliiska ama dembi-baadhayaasha kale weydiinaa inay soo af-jaraan xog-baadhidooda la xidhiidha heerka dhaqaale iyo hantiyeed ee dembiilaha.

9.13 Ka hor kulan-dhegaysiga maxkamadda ee hanti kala wareega, waxaanu maxkamadda iyo dembiilaha u dirnaa xog kooban oo ah hatiyaha la soo ogaadey, si wixii muran ah ee lahaanshahooda ah ama qiimayaashooda ah ay maxkamaddu go'aan ugu gaadhi karto. Waxaau maxkamadda ka codsanaa inay go'aamiyaan xadiga dhaqaale ee ay tahay inuu dembiiluhu bixiyo.

9.14 Halka ay kiisaska qaarkood shaqaalaha maxkamaddu mas'uul ka yihiin ururinta xisaabta lala wareegayo, anaga ayaa shaqadan samayna kiisaska ka adadag, tusaale ahaan, haddii ay tahay in hantida la iibiyo si lacag loo helo. Tan waxaa laga yaabaa inay ku lug yeelato magacaabida Lacag qaade.

9.15 Waxaanu isticmaalaa awoodahayaga si aanu kiis maxkamdda dib ugu celino haddii uu dembiiluhu isku dayo inuu daahiyo ama ka warwareego bixinta lacagta.

Heerka 10

Waxaanu ka fekeri doonaa in aanu isticmaalo xuquuqdayada racfaanka, marka aanu aaminsanahay in maxkamaddu samaysay go'aan sharci oo khalad ah.

10.1 Dacwad-ku qaadiddu waxay leedahay xuquuq racfaan oo xadidan. Waxaanu go'aan ku gaadhnaa in aanu racfaan ka qaadano go'aano maxkamadeed xaaladdaha soo socda:

a) isla markiiba, kiisaska khatarta ah ee xeer-ilaaliyayaal maxkamaddeed bixiyaan damiin, anana aanu u aragno in dacwad-iska difaacaha ay tahay in xabsi lagu hayo inta uu Xaakim Maxkamadd Sare dib uga fiirsanayo damiinta;

b) 24 saacadood gudahood, oo uu ansixiyey Madaxa Dacwad-qaadaha Maxkamadda Sare ama Madaxa Qaybta Saldhigyada ee la xidhiidha, marka uu xaakim kiis joojiyo ka hor inta aan loo ogolaan in gudi garwadeeno ay cadaymaha u fiirsadaan, si kiiska ay Maxkamadda Racfaan dib uga fiirsato sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah; iyo

c) mudo wakhti xadidan gudaheed ah ka dib marka xukunka kiisaska cabirka xadidan ah, halkaas oo aanu Qareenka Guud ka codsano in xukunka loogu gudbiyo Maxkamadda Racfaanka inuu yahay mid ay dhici karto inuu noqdo mid qafiif/debecsanaan aan munaasib ahayn ah. Waxaanu sidoo kale kiiska u gudbinaynaa Qareenka Guud marka uu qof nala soo xidhiidho isagoo odhanaya in ay aaminsan yihiin in xukunku yahay mid qafiif/debecsanaan aan munaasib ahayn ah, ilaa mooyee aanu anagu u aragno in aanu ahayn qafiif/debecsanaan aan munaasib ahayn, marka aanu qofka ay khusayso ogaysiino xuquuqdiisa ama xuquuqdeeda cabasho si toos loogu sameeyo Qareenka Guud. Waxaanu sidoo kale ogaysiinaa dhibanaha ama qoyskiisa xuquuqdooda ah inay Qareenka Guud si toos ah uga codsadaan inuu xukunka u gudbiyo Maxkamadda Racfaanka.

10.2 Waxaanu sidoo kale ka fiirsanaa in aanu isticmaalo racfaano kale oo gaar ah, marka aanu aaminsanahay in aan maxkamaddu ku dhaqmin hanaan-hawleedkii saxda ahaa, samaysay go'aan si aad ah u khaldan, ama uu sharcigu u baahan yahay inay maxkamadda sare kale cadayso.

10.3 Marka uu dacwad-iska difaace racfaan ka qaato go'aan maxkamaddeed, waxaanu qoondaynaa u-doode anaga na metela ama maxkamadda caawiya, filitaanka racfaano laga qaato xukunada ee Maxkamadda Racfaanka gudaheeda, marka aanu hor imaan doono haddii ay jiraan sababo kelifaya in aanu sidaa samayno.

10.4 Marka ay Maxkamadda Racfaanku samaysay ga'aan, aanuna doonayno in aanu go'aanka racfaan kale ka sii qaadano, waxaanu

go’aansanaa in aanu Maxkamadda Racfaanka ka codsano inay cadayso inuu jiro qodob sharci ah oo muhiimad guud u leh dadweynaha kiiska oo ay tahay inay Maxkamadda ugu Saraysaa (Supreme Court) go’aan ka gaadho. Waxaanu sidoo kale hor imaan doonaa Maxkamadda ugu Saraysa si aanu uga caawino go’aan ka gaadhida kiiska uu dacwad-iska difaace u soo gudbiyey.

10.5 Waxaanu dhibanayaasha la socodsiinaa wixii ka soo kordha wixii racfaan ah, waxaanuna u sharaxnaa saamaynta uu go’aanka maxkamaddu iyagu ku yaalanayo.

Heerka 11

Waxaanu si degdeg ah oo furan ugu hawlgeli doonaa cabashooyinka ku saabsan go'aanadayada iyo adeegga aanu bixino

11.1 Waxaanu higsanaa in aanu sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah wax uga qabano cabashooyinka ku saabsan heerarka tayo ee adeegga aanu bixino.

11.2 Haddii aanu cabasho markiiba xalin karo, sidaas ayaanu samayn doonaa; haddii aanay sidaas ahayn, cabashada si rasmi ah ayaa qoraal loogu samayn doonaa, dabadeedna waxaa loogu hawlgelayaa qaab-wajahaad marxaladdo ah, oo marka hore ka bilaabanaysa heer degmo.

11.3 Marxalad walba cabashooyinka waxaanu qoraal ugu samaynaa oo uga warcelinaa sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah, waxaanuna jawaab-celin ku bixinaa sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka a, mudo guud oo xadiddan gudaheed.

11.4 Waanu diidnaa in aanu u hawlgalo cabashooyinka la sameeyo wax ka badan 6 bilood ka dib markii ay dhacday dhacdooyinka la xidhiidha, ilaa mooyee inay jirto sabab wanaagsan oo daahitaanka keentay.

11.5 Waxaanu cabashooyinka uga jawaabnaa si furan oo daacad ah, anagoo ka dheeraana erayada maldaha iyo macnayaasha adadag ee tignikalka ah, anagoo bixinayna jawaab-celin dhamaystiran oo ku wajahan dhamaan arimaha. Markii ay ku haboon tahay, waxaanu aqoonsanaa khalad waxaanuna bixinaa raaligelin. Waxaanu sidoo kale qoraal ku samaynaa wixii casharo ah ee laga qaatay iyo wixii talaabooyin ah ee la qaadayo si looga hortago inay mar kale dacdo.

11.6 Marka ay cabashadu ka hadlayso arimo la xidhiidha ururo kale, sida booliiska ama maxkamaddaha, waxaanu isku daynaa in aanu jawaab-celintayada la waafaqno ururka kale ee ku lug leh, ama aanu la waafaqno inay si toos ah uga jawaabaan qodobada la xidhiidha ayna qofka cabashada samaynaya u sheegaan cida jawaabta celin doonta.

Heerka 12

Waxaanu la shaqayn doonaa bulshooyinka, si aanu u ogaano welweladooda marka aanu go'aanada gaadhayno

12.1 Waxaanu doorarkayaga u sharaxnaa bulshooyinka xaafaddayada, waxaanuna kala tashanaa waxa ay tahay inay noqdaan mudnaanahayagu, taas oo aanu ku weydiino kulan-kooxeedyada bulshada iyo guddiyada.

12.2 Kooxaha iyo guddiyada u-kuurgalka[21] ayaa ra'yi-celin ka bixiya dariiqa ay u badan tahay in bulshooyinku u arkaan go'aan samayntayada iyo hanaan-hawleedkayaga u hawlgalka kiisaska.

12.3 Waxaanu isticmaalaa ra'yi-celin si aanu dib-uga fiirsi ugu samayno qaabka aanu ugu hawlgalo kiisaskayaga.

12.4 Waxaanu booliiska iyo maamulada kale ee degmada kala shaqaynaa in aanu u hawlgalo mudnaanaha xaafaddaha iyo bulshooyinka, sida dhaqamada bulshada dhibka ku ah.

[21] Waxaad intaa wax ka badan oo ku saabsan kooxahaas ama guddiyadaas ka heli kartaa boggayaga internet-ka (www.cps.gov.uk) ama inaad codsato (faahfaahin ka eeg jeldiga xagga dambe).

Kani waa dukumeenti dadweyne.

Nuqulo dheeraad ah oo dukumeentigaan ah iyo warbixino ku saabsan luuqadaha iyo qaababka kale ayaa laga heli karaa:

CPS Communication Division
Rose Court
2 Southwark Bridge
London SE1 9HS

Iimayl: publicity.branch@cps.gsi.gov.uk

Wixii macluumaad ku saabsan Adeegga Dacwad-qaadidda Maxkamadeed, iyo daalacashada ama internet kala soo baxid nuqul elektroonik ah oo dukumeentigaan ah, fadlan booqo boggayaga internet-ka:

www.cps.gov.uk

© Crown Copyright 2010
Waxaa daabacay Blackburns of Bolton